Xuquuqda Waalidka iyo Cunugga ku sugan Waxbarashada Khaaska

Ogeysiiska Habka Badbaadinta

Sharaxaadda Habka Badbaadinta Waxaa Laga Heli Karaa Qodobada

Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Itaalka Daran

(Individuals with Disabilities Education Act) (IDEA)

iyo

Sharciyada Colorado xagga Maamulka

Sharciga Waxbarashada Caruurta Aan Caadiga Ahayn

(Exceptional Children's Educational Act) (ECEA)

Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Itaalka Daran (Individuals with Disabilities Education Act) (IDEA), sharciga Federaalka ee ku saabsan waxbarashada ardayda itaalka daran, waxay dugsiyada ka rabaan in ay waalidiinta cunugga itaalka daran siiyaan ogeysiis laga helo sharaxaad buuxda oo ku saabsan habka badbaadinta laga heli karo IDEA iyo sharciyada u dagsan Waaxda Waxbarashada Mareykanka (US Department of Education). Waalidiinta waa in la siiyo koobiga ogeysiiskaan hal mar keliya sannad dugsiyeedka, hase ahatee waa in waalidiinta la siiyo koobi: (1) marka hore ee la soo jeediyo ama marka waalidka codsado qiimeynta; (2) marka la helo ashtakada kowaad ee Gobolka iyo marka la helo ashtakada kowaad ee la xariirta habka sharciga halkii sanno dugsiyeed; (3) marka go'aan laga gaaro in la qaado talaabo dishibiliin oo u dhiganta isbaddal ku saabsan meeleynta; iyo (4) marka waalidka codsado. [34 CFR §300.504(A)]

TUSMADA

MACLUUMAADKA GUUD **5**

OGEYSIISKA QORAN EE HORE **5**

LUQADDA HOOYO **6**

BOOSTADA ELATAROONIGA **6**

OGOLAASHADA WAALIDKA – SIFEYNTA **6**

OGOLAASHADA WAALIDKA **7**

QIIMEYNTA WAXBARASHADA MADAX BANAAN **9**

ASTURNAANTA MACLUUMAADKA **10**

SIFEYNTA **10**

SHAKHSI AHAAN LA AQOONSAN KARO **10**

OGEYSIISKA LA SIIYO WAALIDIINTA **11**

XUQUUQDA HELITAANKA **11**

DIIWAANKA HELITAANKA **12**

DIIWAANKA IN KA BADAN HAL CUNUG **12**

LIISKA NOOCYADA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA **12**

KHIDMADAHA **12**

BADDALAADDA DIIWAANKA MARKA WAALIDKA CODSADO **12**

FURSADDA DHAGEYSIGA **12**

HABABKA DHAGEYSIGA **13**

NATIIJADA KA SOO BAXDA DHAGEYSIGA **13**

OGOLAASHADA KASHIFAADDA MACLUUMAADKA LAGU AQOONSAN KARO QOFKA **13**

AMMAANKA **13**

BURBURINTA MACLUUMAADKA **14**

HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA **14**

KALA DUWANAANTA U DHEXEYSO ASHTAKADA DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA IYO HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA **14**

KU DHAQANKA HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA **14**

HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA KUWA UGU YAR **15**

SOO GUDBINTA ASHTAKADA **16**

HABABKA ASHTAKADA HABKA SHARCIGA **16**

SOO GUDBINTA ASHTAKADA HABKA SHARCIGA **17**

ASHTAKADA HABKA SHARCIGA **17**

MEELEYNTA CUNUGGA INTA LA SUGAAYO ASHTAKADA IYO DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA **19**

FOOMAMKA CAADIGA **19**

DHEXDHEXAADINTA **19**

HABKA XALLINTA **21**

DHAGEYSIYADA KU SAABSAN ASHTAKOOYINKA HABKA SHARCIGA **22**

DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA AAN DHINACNA LA JIRIN **22**

XUQUUQDA DHAGEYSIGA **23**

GO'AANADA DHAGEYSIGA **24**

KAMA DAMBEYNTA GO'AANKA **25**

WAQTIYADA MUNAASABKA AH IYO ROONAANTA DHAGEYSIYADA **25**

DACWADAHA MADANIGA, SIDA MUDDADA LOO BAAHAN YAHAY IN LA SOO GUDBIYO DACWADAHAAS **25**

KHIDMADAHA QAREENKA **26**

HABABKA MARKA LA EDBINAAYO CARUURTA ITAALKA DARRAN **27**

AWOODDA SHAQAALAHA DUGSIGA **27**

ISBADDALKA MEELEYNTA UGU WACAN KA-SAARIDDA DISHIBILIINKA.....30

GO'AANKA LAGA GAARO HABKA.....30

RACFAANKA (HABABKA DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA EE LA DADAJIYO).....30

MEELEYNTA MUDDADA RACFAANKA.....31

BADBAADINTA LA SIIYO CARUURTA AAN XAQA U LAHAYN WAXBARASHADA KHAASKA AH IYO ADEEGYADA LA XARIIRA.....32

TIXRAACINTA IYO TALAABADA HIRGELINTA SHARCIGA IYO MADAXDA MAXKAMADAHA.....33

SHARUUDAHA MARKA WAALIDKA KELI AHAAN CARUURTA UGU MEELEEYO DUGSIYADA GAARKA AH, KHARASHKANA LAGU DALLACO DADWEYNAHA.....33

GUUD.....33

ILAHA WAALIDKA.....34

MACLUUMAADKA GUUD

OGEYSIISKA QORAN EE HORE

34 CFR § 300.53

Ogeysiis

Qeybta maamulka[1] (Administrative Unit) ama Barnaamijka Gobolka Maamusho[2] waa in uu ku siiyo ogeysiis qoran (qoraal kugu siiyaan macluumaadka qaar), mar kasta:

1. Ay Soo jeediso in ay bilowdo ama baddasho aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashda cunugaada, ama cunugaada siiso waxbarashada dadweynaha ku habboon ee lacag la'aanta ah (FAPE); **ama**
2. Diido in ay bilowdo ama baddasho aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashada cunugaada, ama cunugaada siiso FAPE.

Waxa Ku Jira Ogeysiiska

Ogeysiiska qoran waa:

1. In uu sharaxo talaabada qeybta maamulka[3] soo jeediso ama diido in ay qaado.
2. In uu fasiro sababata qeybta maamulka u soo jeediso ama u diido in ay qaado talaabada;
3. In uu sharaxo habka qiimeyn kasta, baarista, diiwaan gelinta, ama warbixinta ay qeybta maamulka u adeegsatay soo jeedinta ama diidmada talaabada;
4. In lagu soo daro oraah ah in adiga aad leedahay badbaadin sida hoos timaado qodobada badbaadinta ee Qeybta B, Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Itaalka Daran (Individuals with Disabilities Education Act) (IDEA);
5. In uu kuu sheego sida aad ku heli kartid sharaxaadda hababka badbaadinta haddii talaabada ay qeybta maamullka soo jeediso ama diido aysan ahayn ku wareejin hore si loo qiimeeyo;
6. In lagu soo daro ilo aad kula xariiri kartid kaalmo si aad u fahamtid Qeybta B ee IDEA;
7. In uu sharaxo xulashooyinka kale ay Kooxda barnaamijka waxbarashada ku kooban shakhsiga (IED) tixgelisay iyo sababta xuloshooyinkaas loo diiday; **iyo**
8. In uu bixiyo sharaxaad ku saabsan asbaabta qeybta maamulka u soo jeedisay ama u diiday in ay qaado talaabada.

Ogeysiis ku Qoran Luqad La Fahmi Karo

Ogeysiiska waa in:

1. Uu ku qoran yahay luqad ay fahmi karaan dadweynaha guud; **iyo**
2. Laguugu siiyo luqadda hooyo ama isgaarsiin kale aad adeegsatid, haddii aysan caddeyn in sidaas la sameyn karin.

Haddii luqadaada hooyo ama habka kale isgaarsiinta aysan ahayn luqad qoran, qeybta maamulka waa in uu hubsado in:

[1] Qeybta maamulka waxaa loola jeedaa dugsiga dagmada, guddiga adeegyada iskaashiga, ama machadka dugsiga gobolka la xusho ee adeegyada waxbarashada siiya caruurta qaar.

[2] Barnaamijka Gobolka Maamusho waxaa loola jeedaa barnaamij ka jira dugsiga oo la ogolaaday kaasoo ay kormeerto Waaxda, maamulkana ay gacanta ku hayaan Dugsiga Dhagoolaha iyo Cammaha Colorado, Waaxda Dhaqan Celinta (Department of Corrections), ama Waaxda Adeegyada Aadanaha (Department of Human Services), kana mid ah balse aan ku ekeyn Qeybta Dhaqan Celinta Dhalinta (Division of Youth Corrections) iyo Machadyada Caafimaadka Madaxa (Mental Health Institutes), Fort Logan iyo Pueblo.

[3] Xagga warqadaan, mar kasta oo la isticmaalo erayga "Qeybta maamulka" waxaa kaloo lool jeedaa Barnaamijyada Gobolka Maamulo.

1. Afka lagaaga tarjumo ogeysiiska, lana adeegsado luqadaada hooyo ama hab kale oo isgaarsiin ah;
2. Aad fahamsan tahay waxa ku jiro ogeysiiska; **iyo**
3. Ay jirto caddeyn qoran in lala kulmay 1 iyo 2.

LUQADDA HOOYO

34 CFR § 300.29

Luqadda hooyo, marka lala isticmaalo shakhsi aqoontiisa Ingiriisiga kooban tahay, waxaa loola jeedaa sida soo socoto:

1. Luqadda caadi ahaan uu qofkaas isticmaalo, ama, marka laga hadlaayo cunug, luqadda ay caadi ahaan isticmaalaaan waalidiinta cunugga;
2. Dhamaan xariirka toos ahaan lala sameeyo cunugga (kana mid ah qiimeynta lagu sameeyo cunugga), luqadda caadi ahaan uu cunugga isticmaalo guriga ama meesha uu wax ku barto.

Dhagoolaha ama camoolaha, ama qofka aan qabin luqad qoran, habka isgaarsiinta waa waxa qofka uu caadi ahaan isticmaalo (sida luqadda calaamadaha, Braille, ama isgaarsiinta afka).

BOOSTADA ELATAROONIGA

34 CFR § 300.505

Haddii qeybta maamulka ay waalidiinta siiso xulashada helitaanka dokumentiyada lagu helo e-mail, waxaad dooran kartaa in inta soo socoto laguugu soo diro e-mail:

1. Ogeysiiska qoran ee hore;
2. Ogeysiiska badbaadinta; iyo
3. Ogeysiisyada la xariira ashtakada habka sharciga.

OGOLAASHADA WAALIDKA – SIFEYNTA

34 CFR § 300.9

Ogolaashada waxaa loola jeedaa:

1. In adiga si buuxdo laguugu ogeysiiyay luqadaada hooyo ama hab kale oo isgaarsiin ah (sida luqadda calaamaddda, Braille, ama isgaarsiinta afka) dhamaan macluumaadka ku saabsan talaabada aad ka bixineysid ogolaashada;
2. In aad fahamsan tahay iyo in aad waafaqsan tahay qoraal ahaan talaabadaas, iyo in ogolaashada sharaxdo talaabadaas iyo in ay qorto liiska diiwaanka (haddii uu jiro) la siin deyn doono iyo qofka la siin doono;
3. In aad fahamsan tahay in ogolaashadaada tahay mid aad adiga iskaada u gaartid, aad la noqon kartid (ceshan kartid) ogolaashadaada waqti kasta, hase ahatee la noqoshadaada ma diidana (ma furfureyso) talaabo la qaaday kaddib marka aad bixisay ogolaashadaada iyo ka hor inta aadan la noqonin;
4. Haddii aad qoraal ahaan la noqotid (burisid) ogolaashadaada in cunugaada la siiyo adeegyada waxbarashada khaaska ah kaddib waqati uu cunugaada bilaabay in uu qaato waxbarashada khaaska ah iyo adeygada la xariira,

qeybta maamulka loogama baahna in ay wax ka baddasho (baddasho) diiwaanka waxbarashada cunugaada si meesha looga saaro tixraacin kasta in cunugaada la siiyay waxbarashada khaaska ah iyo adeeygada la xariira.

OGOLAASHADA WAALIDKA

34 CFR §300.300

Ogolaashada qiimeynta hore

Qeybta maamulka ma sameyn karto qiimeynta hore ee cunugaada si loo ogaado haddii cunugaada uu xaq u leeyahay sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA sii uu helo waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira hase ahatee marka hore waa in adiga lagu siiyo ogeysiis qoran ee hore kaasoo ku saabsan talaabada la soo jeediyay iyo in la helo ogolaashadaada sida ku sharaxan qeybta **Ogeysiiska Qoran ee Hore** iyo **Ogolaashada Waalidka** (**Prior Written Notice** and **Parental Consent)**.

Qeybta maamulka waa in ay sameeyso dadaal macquul ah si ay u hesho ogolaashadaada xogogaalka ah xagga qiimeynta hore si ay go'aan uga gaarto haddii cunugaada uu yahay cunug itaal daran.

Ogolaashadaada qiimeynta hore ma aha macnaheeda in aad ogolaashadaada siisay qeybta maamulka si loo bilaabo loona siiyo cunugaada waxbarashada khaaska ah iyo adeeygada la xariira.

Qeybta maamulka ma isticmaali karto diidmada aad ka bixisid ogolaashada hal adeeg ama hawl la xariirta qiimeynta hore si kuugu diido adiga iyo si ay cunugaada ugu diido adeegyada kale, manafacaadka, ama hawl haddii uusan jirin qodob kale oo ka tirsan Qeybta B oo maamulka u ogolaada in uu sidaas sameeyo.

Haddii cunugaada uu ku qoran yahay dugsiga dadweynaha ama aad rabtid in aad cunugaada ku qortid dugsiga dadweynaha, aadna diiday in aad bixisid ogolaasho ama aad ku guul dareysatay in aad ka jawaabtid codsiga lagu bixiyo ogolaashada qiimeynta hore, qeybta maamulka waxay raadsan kartaa, hase ahatee waajib kuma aha, in qiimeyn hore lagu sameeyo cunugaada iyada oo isticmaaleysa dhexdhexaadinta IDEA ama ashtakada habka sharciga, shirka xallinta, iyo hababka dhageysiga habka sharciga ee dhexdhexaadka ah (haddii sharciga Gobolka uusan sidaas ku amrin ama ka reebin in ay sidaas sameyso). Qeybta maamulka ma jebin doonto waajibaadka ka saaran raadinta, aqoonsiga iyo qiimeynta cunugaada haddii aysan daba galin qiimeynta cunugaada ku sugan xaaladahaan, haddii sharciga Gobolka uusan ka dalbanin in ay daba gasho qiimeynta.

Sharciyada khaaska ah xagga qiimeynta hore ee lagu sameeyo kuwa ku sugan ilaalinta Gobolka
Haddii cunugga uu ku jiro ilaalinta Gobolka, uusan la nooleen waalidkiisa/waalidkeeda –
Qeybta maamulka uma baahna in ay ogolaasho ka qaadato waalidka si loo sameeyo qiimeynta hore, go'aana looga gaaro haddii cunugga uu yahay cunug itaal daran, haddii:

1. Kaddib marka ay sameeyso dadaal macquul ah, qeybta maamulka aysan heli karin waalidka cunugga;
2. La soo af jaro xuquuqda waalidiinta sida waafaqsan sharciga Gobolka, ama
3. Garsooraha uu xaqa lagu gaaro go'aanada waxbarashada iyo ogolaashada qiimeynta hore u xil saaro qof kale oo aan ahayn waalidka.

Ilaalinta Gobolka, sida IDEA u isticmaasho, waxaa loola jeedaa cunug oo, sida Gobolka go'aamiso meesha cunugga ku nool yahay, ah:

1. Cunug la korsado;
2. Loo haysto in uu hoos yimaado ilaalinta Gobolka sida hoos timaado sharciga Gobolka; ama
3. Ku jiro haynta wakaaladda dadweynaha daryeelka cunugga.

Ilaalinta Gobolka kama mid aha cunugga la korsado ee qaba waalid korsada.

Ogolaashada waalidka xagga adeegyada

Qeybta maamulka waa in ay hesho ogolaashadaada xogogaalka ah ka hor inta aysan cunugaada siinin waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira marka kowaad.

Haddii aadan ka jawaabin codsi ku saabsan in aad bixisid ogolaashadaada in cunugaada la siiyo waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira marka kowaad, ama haddii aad diidid in aad bixisid ogolaashada noocaas ah ama aad goor dambe aad qoraal ahaan la noqotid (burisid) ogolaashadaada, qeybta maamulka ma isticmaali karto badbaadinta (taasoo ah, hababka dhexdhexaadinta, ashtakada habka sharciga, shirka xallinta, ama dhageysiga habka sharciga ee dhedhexaadka ah) si ula heshiiso ama go'aan go'aan looga gaaro in waxbarashada khaaaska ah ama adeegyada la xariira (sida IEP ku taliso) la siin doono cunugaada la'aanta ogolaashadaada.

Haddii aad diidid in aad bixisid ogolaashadaada in cungaada la siiyo waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira marka kowaad, ama haddii aadan ka jawaabin codsi in aad bixisid ogolaashada noocaas ah ama aad goor dambe qoraal ahaan la noqotid (burisid) ogolaashadaada, kaddibna, qeybta maamulka aysan cunugaada siinin waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira taasoo ay u raadsatay ogolaashadaada, qeybta maamulka:

1. Ma jebinin shardiga in ay bixiso waxbarashada dadweynaha ku habboon ee lacag la'aanta ah (FAPE) ee cunugaada uu heli karo bacdamaa ay ku guul dareysatay in ay cunugaada siiso waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira; iyo
2. Loogama baahna in ay qabato shirka barnaamijka waxbarashada ku kooban shakhsiga (IEP) ama in ay IEP u sameyso cunugaada xagga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira, oo ogolaashadaada loo codsaday.

Haddii aad qoraal ahaan la noqotid (burisid) ogolaashadaada waqti kasta kaddib marka kowaad ee cunugaada la siiyo waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira, qeybta maamulka ma sii wadi doonto in ay sii bixiyo adeegyadaas, balse waa in ay ku siiso ogeysiis hore oo qoran, sida ku sharaxan qeybta **Ogeysiiska Qoran ee Hore**, ka hor inta aan la joojinin adeeyadaas.

Ogolaashadaada waalidka xagga dib u qiimeynta
Qeybta maamulka waa in ay hesho ogolaashadaada xogogaalka ah ka hor inta aysan dib u qiimeynin cunugaada, haddii qeybta maamulka aysan caddeyn karin:

1. In ay qaaday talaabooyin macquul ah si ay u hesho ogolaashadaada dib u qiimeynta cunugaada; **iyo**
2. Adigana aadan ka jawaabin.

Haddii aad diidid in aad ogolaatid dib u qiimeynta cunugaada, qeybta maamulka, inkastoo aysan waajib ku ahayn, waxay daba geli kartaa dib u qiimeynta cunugaada iyada oo isticmaasha dhexdhexaadinta, ashatakada habka sharciga, shirka xallinta, iyo hababka dhageysiga dhexdhexaadka ah, una raadsato in ay ka sare marto diidmadaada ku saabsan in cunugaada dib loo qiimeeyo. Sida dib u qiimeynta hore, qeybta maamulka ma jebiso waajibaadka hoos yimaada Qeybta B ee IDEA haddii ay diido in ay sidaan u daba gasho dib u qiimeynta.

Warqadaha ku saabsan dadaalka macquulka ah ee lagu raadiyo ogolaashada waalidka

Qeybta maamulka waa in ay xajiso warqadaha ku saabsan dadaalka macquulka ee lagu raadiyo ogolaashada waalidka xagga qiimeynta hore si marka horeba loo bixiyo waxbarashda khaaska ah iyo adeegyada la xariira, si loo fuliyo dib u qiimenta iyo si loo helo waalidiinta caruurta hoos timaada ilaalinta Gobolka loona siiyo qiimeynta hore. Warqadaha waa in lagu soo daro qoraal ku saabsan isku dayidda ay qeybta maamulka sameeysay, sida:

1. Qoraal tafatiran oo ku saabsan telefoonada la diray ama leysku dayay in la diro iyo natiijadaha ka soo baxay.
2. Koobiyada qoraalada laguu soo diray adiga iyo jawaabaha la helay; **iyo**
3. Qoraal tafatiran oo ku saabsan booqashooyinka lagu tagay gurigaada ama meesha aad ka shaqeysid iyo natiijadaha ka soo baxay booqashooyinkaas.

Sharuudaha Ogolaashada Kale
Looma baahna ogolaashadaada ka hor inta qeybta maamulka aysan:

1. Fiirinin xogta jirta taasoo qeyb ka ah qiimeynta cunugaada ama dib u qiimenta; ama

2. Cunugaada siinin imtixaan ama qiimeynta la siiyo dhamaan caruurta haddii, imtixaankaas ama qiimeynta ka hor, aan loo baahanin in ogolaasho laga helo dhamaan waaldiiinta ee dhamaan caruurta.

Qeybta maamulka ma isticmaali karto diidmadaada, in aad ogolaatay hal adeeg ama hawl, in ay adiga ama cunugaada u diido adeeg kasta oo kale, manafacaad, ama hawl

Haddii aad cunugaada ku qortay dugsi gaar ah adigana aad bixisid kharashka ama haddii aad cunugaada wax ku bartid guriga, aadna bixinin ogolaashadaada ku saabsan in cunugaada horay loo qiimeeyo ama cunugaada dib loo qiimeeyo, ama aad ku guul dareysatid in aad ka jawaabtid codsi in aad bixisid ogolaashadaada, qeybta maamulka ma isticmaali karto hababka looga kor maro ogolaashada (sida dhexdhexaadinta, ashtakada habka sharciga, shirka xallinta, ama dhageysiga habka sharciga ee dhexdhexaadka ah), lagamana rabo in ay cunugaada u qaataan sida in uu xaq u leeyahay in uu helo adeegyo la'eg (sida adeegyada la siiyo caruurta itaalka darran ay waalidiinta ku meeleyaan dugsiga gaarka ah.

QIIMEYNTA WAXBARASHADA MADAX BANAAN

34 CFR §300.502

Guud Ahaan

Sida hoos lagu sharaxay, waxaad xaq u leedahay in cunugaada la siiyo qiimeynta waxbarashada madax banaan (IEE) haddii aad qilaafsan tahay qiimeynta cunugaada ay qeybta maamulka heshay.

Haddii aad codsatid IEE, qeybta maamulka waa in ay ku siiso macluumaad ku saabsan meesha aad ka heli kartid IEE iyo habka qeybta maamulka adeegsatay ee lagu dabaqai karo IEEyada.

Sifeynta

Qiimeynta waxbarashada madax banaan waxaa loola jeedaa qiimeynt uu fulliyo macalin aqoon u leh kaasoo aan u shaqeynin qeybta maamulka ee mas'uulka ka ah waxbarashada cunugaada.

Kharashka dadweynaha waxaa loola jeedaa in qeybta maamulka ay bixiso kharashka oo idil ee ku baxa qiimeynta ama waxay hubisaa in qiimeynta la siiyo kharash la'aan, sida waafaqsan qodobada Qeybta B ee IDEA, taasoo Gobol kasta u ogolaata in ay isticmaasho kaalmada ilo kasta oo laga heli karo Gobolka, deegaanka, Federaalka iyo ilaha gaarka ah ee laga heli karo Gobolka si loola kulmo sharuudaha Qeybta B ee Sharciga.

Xaqa Waalidka u Leeyahay in kharasha qiimeynta lagu dallaco dadweynaha

Waxaad xaq u leedahay in cunugaada la siiyo IEE iyo in kharashkana lagu dallaco dadweynaha haddii aad qilaafsan tahay qiimeynta cunugaada ay qeybta maamulka heshay, sida hoos timaado sharuudaha soo socda:

1. Haddii aad codsatid in cunugaada la siiyo IEE, kharashkana lagu dallaco dadweynaha, qeybta maamulka, iyada oo aan daahinin, waxay: (a) Soo gudbin kartaa ashtakada habka sharciga si ay u codsadato dhageysi si ay u muujiyaan in qiimeynta lagu sameeyay cunugga tahay mid habboon; ama (b) Bixisaa IEE, kharashkana lagu dallaco dadweynaha, haddii qeybta maamulka ku caddeeyso dhageysi in qiimeynta cunugaada ee aad heshay aysan la kulmin habka qeybta maamulka.
2. Haddii qeybta maamulka codsato dhageysi kaddibna go'aanka ugu dambeeyo noqdo in qiimeynta qeybta maamulka ku sameysay cunugaada tahay mid habboon, waxaad xaq u yeelan doontaa IEE, hase ahatee kharashka laguma dallici karo dadweynaha.
3. Haddii aad codsatid IEEda cunugaada, waxaa dhici karto in qeybta maamulka ku weydiiso sababta aad u diidan tahay qiimeynta cunugaada lagu sameeyay, oo ah tan ay heshay qeybta maamulka Hase ahatee, waxaa dhici karto in qeybta maamulka aysan waajib kaaga dhigin in aad bixisid sharaxaad, si aan caqligal ahayna uma daahin karto bixinta IEEda cunugaada, kharashkana lagu soo dallaco dadweynaha, ama soo gudbinta ashtakada habka sharciga si ay u codsato dhageysiga habka sharciga si ay u difaacdo qiimeynta qeybta maamulka ku sameysay cunugga.

Waxaad xaq u leedahay in cunugaada lagu sameeyo hal qiimenta waxbarashada madax banaan, kharashkana lagu soo dallaco dadweynaha, mar kasta ay qeybta maamulka fulliso qiimeynta cunugaada ee aad qilaafsan tahay.

Qiimeynta Waalidka Bilaabo
Haddii aad heshid qiimeynta waxbarashada madax banaan ee cunugaada, kharashkana lagu soo dallaco dadweynaha, ama aad qeybta maamulka la qeybsatid qiimeynta cunugaada, kharashkana si gaar ah loo bixiyay:

1. Qeybta maamulka waa in ay tixgeliso natiijadaha ka soo baxay qiimeynta cunugaada, haddii ay la kulanto habka qeybta maamulka xagga IEE, go'aan kasta oo laga gaaro waxbarashada dadweynaha ku habboon ee lacag la'aanta ah (FAPE) ee la siiyo cunugaada; **iyo**

2. Adiga ama qeybta maamulka waxaad qiimeynta u soo bandhigi kartiin sida caddeyn la hordhigo dhageysiga habka sharciga ee ku saabsan cunugaada.

Codsiyada qiimeynta ay sameyaan garsooreyaasha maamulka sharciga
Haddii garsooraha maamulka sharciga codsado in qiimeynta waxbarashada madax banaan lagu sameeyo cunugaada, taasoo qeyb ka ah dhageysiga habka sharciga, kharashka qiimeynta waa in lagu dallaco dadweynaha.

Habka Qeybta maamulka
Haddii dadweynaha lagu soo dallaco kharashka ku baxa qiimeynta waxbarashada madax banaan, habka loo adeegsaday qaadista qiimeynta, kana mid ah goobta lagu qaaday qiimeynta iyo aqoonta baaraha, waa in ay ahadaan isla mid sida habka qeybta maamulka adeegsato marka ay bilaabeyso qiimeynta (ilaa hababkaa loo aqoonsado in ay waafaqsan yahiin xaqa aad u leedahay qiimeynta waxbarashada madax banaan).

Marka laga reebo habka lagu sharaxay kor, qeybta maamulka ma dul saari karto sharuudo ama waqtiyo la xariira helitaanka qiimeynta waxbarashada madax banaan, kharshkana laga qaado dadweynaha.

ASTURNAANTA MACLUUMAADKA

SIFEYNTA

34 CFR §300.611

Sida loo isticmaalay sida hoos timaado magaca **Asturnaanta Macluumaadka**

Burburin waxaa loo jeedaa burburinta shayga ama ka saaridda macluumaadka lagu aqoonsado qofka si macluumaadka shakhsiga aan loo aqoonsan karin.

Diiwaanka waxbarashada waxaa loola jeedaa nooca xogta hoos timaada sifeynta "diiwaanka waxbarashada" ee 34 CFR Qeybta 99 (sharciyada hirgeliya Sharciga Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska (Family Educational Rights and Privacy Act) ee 1974, 20 U.S.C. 123G (FERPA)).

Wakaaladda Ka Qeybgasha waxaa loola jeedaa wakaalad ama hay'ad kasta oo dadweynaha u shaqeyso oo aruuriso, xajiso, ama isticmaasho macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga, ama laga helo macluumaad, sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA.

SHAKHSI AHAAN LA AQOONSAN KARO

34 CFR §300.32

Shakhsi ahaan la aqoonsan karo waxaa loola jeedaa macluumaadka laga helo:

(a) Magaca cunugaada, magacaada adiga oo ah waalidka, ama magaca xubin kale oo ka tirsan qoyska;
(b) Cinwaanka cunugaada;
(c) Wax lagu aqoonsado qofka, sida nambarka soshal sekuritiga cunugaada ama nambarka ardayga, ama
(d) Liiska waxyaabaha lagu aqoonsado qofka ama maclumaad kale oo suurtgelin kara in la aqoonsado cunugaada ilaa xad macquul ah.

OGEYSIISKA LA SIIYO WAALIDIINTA

34 CFR §300.612

Waaxda Waxbarashada Colorado (CDE) waa in ay bixiso ogeysiis ku filan si waalidiinta si buuxdo loola socodsiiyo asturnaanta macluumaadka aqoonsiga shakhsiga, sida:

1. Sharaxaad ku saabsan ilaa xadka ogeysiiska lagu bixiyay luqadaha dadyowga kala duwan ee ku nool Gobolka;
2. Sharaxaad ku saabsan caruurta laga haayo macluumaadka aqoonsiga shakhsiga, noocyada macluumaadka la raadinaayo, hababka Gobolka ku talojiro in uu u adeegsado aruurinta macluumaadka (sida ilaha laga aruuriyo macluumaadka), iyo isticmaalka laga sameeyo macluumaadka;
3. War kooban oo ku saabsan siyaasadaha iyo hababka loo baahan in wakaaladaha ka-qeybgalo raacaan xagga keydinta, kashifaadda wararka la siiyo dhinacyada saddaxaad, haynta, iyo burburinta macluumaadka aqoonsiga shakhsiga, **iyo**
4. Sharaxaad ku saabsan dhamaan xuquuqda waalidka iyo caruurta xagga macluumaadkaan, sida xuquuqda hoos timaado Sharciga Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska (Family Educational Rights and Privacy Act (FERPA) iyo sharciyada hirgelinta 34 CFR Qeybta 99.

Ka hor inta aan lagu dhaqaaqin aqoonsi weyn, meesha uu ku sugan yahay, ama hawsha qiimeynta (loona yaqaan "helitaanka cunugga"), ogeysiiska waa in lagu soo daabaco ama lagu baafiyo wargeysyada ama war baahinta kale, ama labadaba, kuwasoo ku filan in waalidiinta gobolka la ogeysiiyo hawsha si loo ogaado goobta, loo aqoonsado, loona qiimeeyo caruurta u baahan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira.

XUQUUQDA HELITAANKA

34 CFR §300.613

Wakaaladda ka qeybgasha waa in ay kuu ogolaato in aad baartid, aadna fiirisid diiwaanka waxbarashada cunugaada, kuwasoo la soo aruuriyay, xajiyay, ama ay adeegsatay qeybta maamulka sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA. Wakaaladda ka-geybgasha waa in ay u hoggaansanto codsigaada in aad baartid aadna fiirisid diiwaanka waxbarashada cunugaada iyadoo aan la daahinin iyo ka hor shir kasta oo ku saabsan barnaamijka waxbarashada lagu koobo shakhsiga (IEP), ama dhageysi kasta oo ku saabsan nidaamka sharciga ee dhexdhexaadka ah (sida shirka xallinta ama dhageysi ku saasban dishibiliinka), iyo marna waa in ayan ka badan 45 maalmaha caadiga kaddib marka aad codsatid.

Xaqa aad u leedahay baarista iyo fiirinta diiwaanka waxbarashada waxaa ka mid ah:

1. Xaqa in aad jawaab ka heshid wakaaladda ka qeybgasha xagga codsiyadaada macquulka ah kuna saabsan sharaxaadda iyo tarjumada laga sameeyo diiwaanka;
2. Xaqa aad u leedahay in aad codsatid in wakaaladda ka qeybgasha ay koobiyo ka bixiso diiwaanka haddii aadan si dhab ah u baari karin una fiirin karin diiwaanka ilaa aad ka heshid koobiyadaas; **iyo**
3. Xaqa aad u leedahay in wakiilkaada uu baaro iyo in uu fiiriyo diiwaanka.

Wakaaladda ka qeybgasha waa in ay u qaadato in adiga aad leedahay awoodda aad ku baartid kuna fiirisid diiwaanka la xariira cunugaada ilaa laga ogeysiiyo in adiga aadan lahayn awoodaas sida hoos timaado sharciga Gobolka ee lagu dabaqai karo arrimaha noocaas sida ilaalinta cunugga, kala tagidda iyo furiinka.

DIIWAANKA HELITAANKA

34 CFR §300/614
Wakaalad kasta oo ka qeybgasho waa in ay diiwaan ka reebto dhinacayada hela diiwaanka waxbarashada la soo aruuriyay, xajiyay, ama la isticmaalay sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA (marka laga reebo waalidiinta iyo shaqaalaha wakaaladda ka-qeybgasho ee loo ogolaaday), sida magaca cidda ay tahay, taariikhda loo ogolaaday, iyo ujeedada loo siiyay ogolaashada isticmaalka diiwaanka.

DIIWAANKA IN KA BADAN HAL CUNUG

34 CFR §300.615
Haddii diiwaanka waxbarashada laga helo macluumaad ku saabsan in ka badan hal cunug, waalidiinta caruurtaas waxay xaq u leeyahiin in ay baaraan iyo in ay fiiriyaan macluumaadka la xariira cunugooda ama in war laga siiyo macluumaadkaas gaarka ah oo keliya.

LIISKA NOOCYADA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA

34 CFR §300.616
Marka aad codsatid, wakaalad kasta oo ka qeybgasha waa in ay ku siiso liiska noocyada iyo goobaha laga soo aruuriyay diiwaanka waxbarashada, xajiyay, ama ay adeegsatay wakaaladda.

KHIDMADAHA

34 CFR §300.617
Wakaalad kasta oo ka qeybgasho waxay soo dallaci kartaa kharashka ku baxa sameynta koobiyada diiwaanka sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA, hadii kharashkaas uusan dhab ahaan kaa reebin in aad adeegsatid xaqa aad u leedahay in aad baartid kuna fiirisid diiwaankaan.

Wakaaladda ka qeybgasha ma soo dallaci karto kharashka ku baxa raadinta ama soo saaridda macluumaadka sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA.

BADDALAADDA DIIWAANKA MARKA WAALIDKA CODSADO

34 CFR §300.618
Haddii aad aaminsan tahay in macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada cunugaada laga soo aruuriyay, xajiyay, ama la isticmaalay sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA in uusan sax ahayn, marin habaabiyo, ama jebiyo asturnaanta ama xuquuq kale uu cunugaada leeyahay, waxaad codsan kartaa in wakaaladda ka qeybgasho ee haayso macluumaadka in ay baddasho macluumaadka.

Wakaaladda ka qeybgasho waa in ay go'aan ka gaarto haddii loo baahan yahay in la baddalo macluumaadka sida waafaqsan codsigaada muddo macquul ah gudaheeda laga bilaabo marka la helo codsigaada.

Haddii wakaaladda ka qeybgasho diido in ay baddasho macluumaadka sida waafaqsan codsigaada, waa in ay kuu sheegto diidmada kuuna sheegto xaqa aad u leedahay dhageysi ku saabsan ujeedadaan sida ku sharaxan ee hoos timaado qodobka **Fursadda Dhageysiga**.

FURSADDA DHAGEYSIGA
34 CFR §300.619

Marka aad codsatid, wakaaladda ka qeybgasho waa in ay ku siiso fursadda dhageysiga aad ku su'aali kartid macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada cunugaada si loo hubsado in uusan ku jirin khalad, habaabin, ama wax kale oo jebiya asturnaanta ama xuquuqda kale ee cunugga.

HABABKA DHAGEYSIGA

34 CFR §300.621
Dhageysiga lagu su'aalo macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada waa in loo fulliyo sida waafaqsan hababka dhageysiyada noocaas sida hoos timaado Sharciga Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Waalidka (Family Educational Rights ana Privacy Act) (FERPA).

NATIIJADA KA SOO BAXDA DHAGEYSIGA

34 CFR §300.620
Dhageysiga awgeed, haddii wakaaladda ka-qeybgasha go'aan ku gaarto in macluumaadka uusan sax ahayn, marin habaabiyo ama si kale u jebiyo asturnaanta ama xuquuqda kale uu cunugaada leeyahay, waa in ay baddashaa macluumaadka sida ku habboon, kuna soo ogeysiiso qoraal ahaan.

Dhageysiga awegeed, haddii wakaaladda ka-qeybgasha go'aan ku gaarto in khalad uusan ku jirin macluumaadka, uusan marin habaabinin, ama si kale u jebinin asturnaanta ama xuquuqda cunugaada, waa in ay ku ogeysiiso xaqa aad u leedahay in aad diiwaanka cunugaada gelisid oraah oo faalo ka bixisa macluumaadka ama sheegta asbaabta aad ku qilaafsan tahay go'aanka wakaaladda ka-qeybgasha.

Sharaxaadda noocaas ee la geliyo diiwaanka cunugaada waa in:

1. Ay haayso wakaaladda ka-qeybgasho sida qeyb ka tirsan diiwaanka cunugaada ilaa inta diiwaanka ama qeybta leysku haysto ay haayso wakaaladda ka-qeybgasha, **iyo**
2. haddii wakaaladda ka-qeybgasha ay cid kale u kashifto diiwaanka cunugaada ama qeybta leysku haysto, sidoo kale sharaxaadda waa in loo kashifo ciddaas.

OGOLAASHADA KASHIFAADDA MACLUUMAADKA LAGU AQOONSAN KARO QOFKA

34 CFR §300.622
Haddii macluumaadka ku jiro diiwaanka waxbarashada, iyo kashifaadda la soo amro iyadoo aan ogolaasho laga haysanin waalidka sida hoos timaado Sharciga Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Waalidka (Family Educational Rights ana Privacy Act) (FERPA), waa in la helo ogolaashadaada ka hor inta aan macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka loo kashifin dhinacyo kale marka laga reebo sarakiisha wakaaladaha ka-qeybgala. Marka laga reebo sida hoos timaado xaaladaha hoos lagu tilmaamay, looma baahna ogolaashadaada ka hor inta aan sarakiisha wakaaladaha ka-qeybgala la siinin macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga si loola kulmo qodob ku jira Qeybta B ee IDEA.

Waa in la helo ogolaashadaada, ama ogolaashada cunugga marka uu gaaro da'da qaangaarka sida hoos timaado sharciga Gobolka ka hor inta aan sarakiisha wakaaladaha ka-qeybgala aan la siinin macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga, kuwasoo laga helo ama bixiya kharashka adeegyada kala guurka.

Haddii cunugaada uu ku jiro, ama uu geli doono dugsi gaar ah oo aan ku oolin isla qeybta maamulka, uusan dagganeyn, waa in la helo ogolaashadaada ka hor inta macluumaadka lagu aqoonsan karo cunugaada aysan isdhaafsanin sarakiisha qeybta maamulka, meesha uu ku yaalo dugsiga gaarka ah, iyo sarakiisha qeybta maamulka adiga aad daggan tahay.

AMMAANKA

34 CFR §300.623

Wakaalad kasta oo ka-qeybgasho waa in ay badbaadiso asturnaanta macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga marxaladaha aruurinta, keydinta, kashifaadda, iyo burburinta.

Hal sarkaal oo ka tirsan wakaaladda ka-qeybgasha waa in uu mas'uul ka noqdo hubinta asturnaanta macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga.

Dhamaan dadka soo aruuriya ama isticmaala macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga waa in ay qaataan tababar ama daruus ku saaban siyaadaha Gobolka iyo hababka ku saabsan asturnaanta sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA iyo Sharciga Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Waalidka (Family Educational Rights ana Privacy Act) (FERPA).

Wakaalad kasta oo ka-qeybgasha waa in ay haayso, si dadweynaha u baaraan, liiska iminka jira ee magacyada iyo mansabyada shaqaalaha ka tirsan wakaaladda oo laga yaabo in ay heli karaan macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga.

BURBURINTA MACLUUMAADKA

34 CFR §300.624

Qeybta maamulka waa in ay ku ogeysiiso marka macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga ee la soo aruuriyay, la haayay, ama la isticmaalay aan loo baahneyn xagga adeegyada waxbarashada la siiyo cunugaada.

Waa in la burburiyo macluumaadka kaddib marka aad codsatid. Hase ahatee, waxaa dhici karto in diiwaanka lagu sii haayo magaca cunugaada, cinwaanka, iyo nambarka telefoonka, darajooyinkiisa ama darajooyinkeeda, diiwaanka imaashada, fasalada la qaatay, heerka darajada la dhamaystay, iyo sannadka la dhameyay, iyadoo aan lagu xerin waqti.

HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA

KALA DUWANAANTA U DHEXEYSO ASHTAKADA DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA IYO HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA

Sharciyada ku jiro Qeybta B ee IDEA waxay hab gaar ah u dajiyaan ashtakooyinka Gobolka iyo ashtakooyinka habka sharciga. Sida lagu sharaxay hoos, qof kasta ama urur wuxuu qoraal ahaan u soo gudbin karaa ashtakada Gobolka oo saxiixan, taasoo ku doodeysa jebinta qodob ku jira Qeybta B ay sameysay qeybta maamulka ama Waaxda Waxbarashda Colorado (Colorado Department of Education) (CDE). Waalid ama qeybta maamulka oo keliya ayaa soo gudbin kara ashtakada habka sharciga ama xaajo kasta oo la xariirta fikrad la soo jeediyay ama diidmo lagu bilaabo ama lagu baddalo aqoonsiga, qiimeynta ama meeleynta waxbarashada cunug itaal daran, ama cunug la siiyo waxbarashada dadweynaha (FAPE). Guud ahaan, Sarkaalka Ashtakooyinka Gobolka ee CDE waa in uu go'aan ka gaaro ashtakada Gobolka muddo 60-maalmaha-caadiga, haddii aan waqtiyadaas sida ku habboon loo dheereynin. Taas waxaa ka duwan marka garsooraha sharciga maamulka (ALJ) go'aan ka gaaro ashtakada habka sharciga (haddii aan lagu dhameynin shirka xallinta ama dhexdhexaadin) iyo waa in uu soo saaro go'aan qoran muddo 45-maalmaha-caadiga kaddib dhamaadka muddada go'aanka, sida ku sharaxan warqadaan hoos timaada qeybta **Habka Gaarista Go'aanka**. Marka hal dhinac oo ka tirsan dhinacyada codsato, ALJ wuxuu siin karaa dheereyn cayiman oo ku saabsan waqtiyada ashtakada habka sharciga. Ashtakada Gobolka, ashtakada habka sharciga, shirarka gaarista go'aanka iyo hababka dhageysiga habka sharicga waxaa si buuxdo loogu sharaxay hoos.

KU DHAQANKA HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA

34 CFR §300.151

Guud

CDE waa in ay leedahay habab qoran xagga:

1. Go'aaminta ashtako kasta, kana mid ah ashtakada uu soo gudbiyo urur ama shakhsi ka socda Gobol kale;
2. Ashtakada loo gudbiyo CDE; iyo
3. Sida balaaran ee loo wareejiyo hababka ashtakada Gobolka lana gaarsiiyo waalidiinta iyo shakhsiyaadka kale ee daneeyo, kana mid ah tababarka waalidka iyo xarumaha macluumaadka, wakaaladaha badbaadinta iyo u-doodidda, xarumaha nolosha madax banaan, iyo hay'adaha kale ee ku habboon.

Wax ka qabashada diidmada adeegyada ku habboon

Marka la xallinaayo ashtakada Gobolka, ay CDE u aragtay in lagu guul dareystay bixinta adeegyada ku habboon, CDE waa in ay wax ka qabato:

1. Guul darrada bixinta adeegyada ku habboon, kana mid ah talaabada ku habboon si wax looga qabto baahida cunugga; **iyo**
2. Adeegyada ku habboon ee la siiyo caruurta itaalka darran mustaqbalka.

HABABKA ASHTAKADA GOBOLKA KUWA UGU YAR

34 CFR §300.152

Waqtiga; hababka ugu yar

CDE waa in ay ku soo darto hababkeeda ashtakada Gobolka waqti oo ah 60 maalmaha jadwalka kaddib marka la soo gudbiyo ashtakada si ay:

1. Goobta uga fulliso baaritaan madax banaan, haddii CDE go'aansato in loo baahan yahay baaritaan;
2. Dhinaca soo ashtakaday u siiso fursad ay ku soo gudbiso macluumaad dheeraad ah, ama ha ahaato afka ama qoraal ahaan, kuna saabsan waxyaabaha lagu sheego ashtakada;
3. Qeybta maamulka u siiso fursad ay uga jawaabto ashtakada, kana mid ah ugu yaraan: (a) sida ay rabto wakaaladda, fikrad lagu xalliyo ashtakada; **iyo** (b) fursad ay iskooda ugu heshiyaan dhexdhexaadin, waalidka soo gudbiyay ashtakada iyo wakaaladda;
4. U fiiriso dhamaan macluumaadka munaasabka ah iyo in ay gaaraan go'aan madax banaan oo ku saabsan haddii qeybta maamulka jebiso qodob ka tirsan Qeybta B ee IDEA; **iyo**
5. U soo saarto go'aan qoran lana siiyo dhinaca soo ashtakooday oo ka hadla qodob kasta oo laga dacwooday ee ku jira ashtakada lagana helo: (a) xaqiiqada iyo go'aanada; **iyo** (b) asbaabta loo gaaray go'aanada ugu dambeeyo ee CDE.

Dheereynta waqtiga; go'aanka ugu dambeeyo; hirgelinta

Hababka CDE ee kor lagu sharaxay waa in ay sidoo kale:

1. Ogoladaan in la dheereeyo waqiga ilaa 60 maalmaha jadwalka haddii: (a) ay jiraan xaalado aan caadi ahayn oo gaar ahaan la xariira ashtakada Gobolka; ama (b) adiga iyo qeybta maamulka ama wakaaladaha dadweynaha ee ku lug leh aad iskiina ugu heshiiseen in aad dheereysiin waqtiga lagu xalliyo xaajada laguna dhexdhexaadiyo ama habab kale oo lagu dhameeyo qilaafka.

2. Ku daraan habab oo si la taaban karo lagu hirgeliyo go'aanka ugu dambeeyo ee CDE, haddii loo baahdo, sida: (a) hawlaha gargaarka farsamada; (b) waanwaanta; **iyo** (c) falalka sixidda si loo hoggaansamo.

Ashtakooyinka Gobolka iyo dhageysiyada habka sharciga

Haddii la helo ashtakada Gobolka oo qoran kuna saabsan mowduuca dhageysiga habka sharciga sida ku sharaxan hoos, magaca Gudbinta Ashtakada Habka Sharciga (Filing a Due Process Complaint), ama dhowr arrimo ku jiraan ashtakada Gobolka, oo hal ama ka baddan ay qeyb ka yahiin dhageysiga noocaas ah, Gobolka waa in uu dhinac iska dhigaa ashtakada Gobolka, ama qeyb kasta oo ka tirsan ashtakada Gobolka ee looga hadlay dhageysiga habka sharciga ilaa dhageysiga ka dhamaado. Arrin kasta oo ku jirta ashtakada Gobolka oo aan qeyb ka ahayn dhageysiga habka sharciga waa in la xalliyo lana isticmaalo waqtiga la xadiday iyo hababka lagu sharaxay kor.

Haddii lagu soo qaado ashtakada Gobolka arrin horay go'aan looga gaaray dhageysiga habka sharciga kuna lug leh isla dhinacyo (adiga iyo qeybta maamulka), markaas go'aanka ka soo baxa dhageysiga habka sharciga waa sharci, iyo CDE waa in ay ogeysiiso dhinaca ashtakooday in go'aanka yahay mid waajib ku ah dhinac kasta.

CDE waa in ay xal ka gaarto ashtakada ku doodda in qeybta maamulka ku guul darreysatay fullinta go'aanka dhageysiga habka sharciga.

SOO GUDBINTA ASHTAKADA

34 CFR §300.153

Urur ama shakhsi waxay qoraal ahaan u soo gudbin karaan ashtakada Gobolka oo qoran sida hoos timaado hababka lagu sharaxay kor.

Ashtakada Gobolka waa in laga helo:

1. Oraah in qeybta maamulka jebisay qodob ku jira Qeybta B ee IDEA ama sharcigeeda;
2. Xaqiiqada ay oraahada ku saleysan tahay;
3. Saxiixa iyo macluumaadka xariirka dhinaca soo gudbiyay ashtakada; iyo
4. Haddii dhinacyada ku doodaan jebinta ku saabsan cunug:
    (a) Magaca cunugga iyo cinwaanka guriga cunugga;
    (b) Magaca dugsiga cunugga uu tago;
    (c) Marka cunugga yahay guri laawe ama dhalin yar, macluumaadka lagala xariiri karo cunugga, iyo magaca dugsiga cunugga uu tago;
    (d) Sharaxaad ku saasban waxa ay tahay dhibaatada haysata cunugga, sida xaqiiqada la xariirta dhibaatada; iyo
    (e) Xalka laga soo jeediyay dhibaatada ilaa inta la ogsoon yahay ayna heli karaan dhinaca soo gudbiyay ashtakada waqtiga ashtakada la soo gudbiyay.

Ashtakada waa in lagu sheego jebinta dhacday inta ugu badan hal sanno ka hor taariikhda la helay ashtakada sida ku sharaxan magaca Ku Dhaqanka Hababka Ashtakada Gobolka.

Dhinaca soo gudbiya ashtakada Gobolka waa in ay koobiga ashtakada u gudbiyaan qeybta maamulka, ee u adeegta cunugga isla waqtiga dhinaca ay ashtakada u soo gudbiso CDE.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hababka Ashtakada Gobolka ee CDE iyo foomamka ka heli kartaa marka aad wacdid Qeybta Hoggaanka Ardayga Aan Caadiga Ahayn (Exceptional Student Leadership Unit) ee CDE, telefoonka (303)866-6694 ama marka aad tagtid bogga internetka Xallinta Qilaafka (Dispute Resolution) ee CDE: http://www.cde.state.co/us/spedlaw/info.htm.

HABABKA ASHTAKADA HABKA SHARCIGA

SOO GUDBINTA ASHTAKADA HABKA SHARCIGA

34 CFR §300.507

Guud

Adiga ama qeybta maamulka waxaad soo gudbin kartiin ashtakada habka sharciga xaajo kasta oo ku saabsan talo la soo jeediyay ama diidmo si loo bilaabo ama loo baddalo aqoonsiga, qiimeynta ama meeleynta waxbarashada cunugaada, ama cunugaada in la siiyo waxbarashada dadweynaha ku habboon ee lacag la'aanta ah (FAPE).

Ashtakada habka sharciga waa in ay sheegto jebinta dhacday in ka yar labo sanno ka hor inta aadan adiga ama qeybta maamulka ogaanin ama ay ahayd in aad ogaataan falka la sheegaayo, kaasoo aasaas u ah ashtakada habka sharciga.

Adiga laguuguma dabaqi karo waqtiga kor ku qoran haddii aadan soo gudbin karin ashtakada habka sharciga muddada la qabtay gudaheeda maxaa yeelay:

1. Qeybta maamulka ayaa si cayiman oo khalada ah u soo bandhigtay in ay xallisay arrimaha lagu aqoonsaday ashtakada; **ama**
2. Qeybta maamulka ayaa kaa reebatay macluumaad laga rabay in ay ku siiso sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA.

Macluumaadka la siiyo waalidiinta

Qeybta maamulka waa in ay ku ogeysiiso haddii ay jiraan adeegyada sharciga kharashka yar ama lacag la'aanta ah iyo adeegyada kale ee la xariira lagana heli karo goobta haddii aad codsatid macluumaadka, ama haddii adiga ama qeybta maamulka soo gudbisaan ashtakada habka sharciga.

ASHTAKADA HABKA SHARCIGA

34 CFR §300.508

Guud

Si aad u codsatid dhageysi, adiga ama qeybta maamulka (ama qareenkaada ama qareenka qeybta maamulka) waa in aad dhinaca kale u gudbisaan ashtakada habka sharciga. Ashtakadaas waa in laga helo dhamaan waxa ku qoran hoos, iyo waa in la asturo.

Adiga ama qeybta maamulka, hadba kii soo gudbiya ashtakada, waa in aad koobiga ashtakada siisaan Waaxda Waxbarashada Colorado (Colorado Department of Education) (CDE).

Waxa ku jira ashtakada

Ashtakada habka sharciga waa in ay ku jiraan:

1. Magaca cunugga;
2. Cinwaanka guriga cunugga;
3. Magaca dugsiga cunugga;
4. Haddii cunugga uu yahay guri laawe ama dhalin yaro, macluumaadka lagala xariiro cunugga iyo magaca dugsiga cunugga;
5. Sharaxaad ku saabsan waxa dhibaatada cunugga tahay lana xariirta falka la soo jeediyay ama la diiday, kana mid ah xaqiiqada la xariirta dhibaatada; **iyo**
6. Xalka la soo jeediyay ee ku saabsan dhibaatada ilaa inta la ogsoon yahay iyo inta aad adiga ama qeybta maamulka heli karto waqtigaas.

Ogeysiiska loo baahan yahay ka hor inta aan la qabanin ashtakada habka sharciga

Waxaa dhici karto in adiga ama qeybta maamulka aadan yeelanin dhageysiga habka sharciga ilaa adiga ama qeybta maamulka (ama qareenkaada ama qareenka qeybta maamulka), soo gudbisaan ashtakada habka sharciga, taasoo laga helo macluumaadka kor ku qoran.

Ku filnaanta ashtakada

Si ashtakada habka sharciga horay u sii socoto, waa in loo arko in ay ku filan tahay. Ashtakada habka sharciga waxaa loo haystaa in ay ku filan tahay (in ay la kulantay sharuudaha kor lagu sharaxay) haddii dhinaca qaadanaayo ashtakada habka sharciga (adiga ama qeybta maamulka) aadan qoraal ahaan soo ogeysiinin garsooraha maamulka sharciga loo xil saaray (ALJ) iyo dhinaca kale, muddo 15 maalmaha jadwalka laga bilaabo marka aad heshaan ashtakada, in dhinaca helay aaminsan yahay in ashtakada habka sharciga aysan la kulmin sharuudaha kor ku qoran.

Muddo shan maalmaha jadwalka gudahooda kaddib marka la helo ogeysiiska aad adiga ama qeybta maamulka aad u haysataan in ashtakada habka sharciga aysan ku filneen, ALJ waa in ay go'aan ka gaarto haddii ashtakada habka sharciga la kullanto sharuudaha kor ku qoran, kaddibna isla markiiba qoraal ahaan ku ogeysiiso adiga iyo qeybta maamulka.

Baddalaadda Ashtakada

Marka keliya aad adiga ama qeybta maamulka aad baddali kartiin (ku sameyn kartaan baddalaad) ashtakada waa haddii:

1. Dhinaca kale, qoraal ahaan, ogolaado baddalaadda lana siiyo fursad lagu xalliyo ashtakada habka sharciga iyadoo loo adeegsanaayo shirka xallinta, sida lagu sharaxay hoos, **ama**
2. Ugu dambeyn shan maalin ka hor inta aan la bilaabin dhageysiga habka sharciga, ALJ waxay bixisay fasax lagu baddalo ashtakada.

Haddii dhinaca ashtakooda (adiga ama qeybta maamulka) wax ka baddasho ashtakada habka sharciga, waqtiyada shirka lagu xallinaayo (15 maalmaha jadwalka gudahooda laga bilaabo marka la helo ashtakada) iyo muddada xallinta (30 maalmaha jadwalka gudahooda laga bilaabo marka la helo ashtakada) waxay bilowdaan mar kale taariikhda la soo gudbiyo ashtakada la baddalay.

Jawaabta Qeybta Maamulka ka bixiso ashtakada habka sharciga

Haddii qeybta maamulka aysan ogeysiis hore oo qoran kuu soo dirin adiga, sida ku sharaxan ee hoos timaado Ogeysiiska Hore oo Qoran, kuna saabsan xaajada ku jirta ashtakada habka sharciga, qeybta maamulka waa in ay kuu soo dirto jawaab, muddo 10 maalmaha jadwalka laga bilaabo marka la helo ashtakada habka sharciga, laguna soo daro:

1. Sharaxaad ku saabsan sababta qeybta maamulka u soo jeedisay ama diiday in ay qaado talaabada lagu soo qaaday ashtakada habka sharciga.
2. Sharaxaad ku saabsan talooyinka kale uu barnaamijka waxbarashada ku kooban shakhsiga ee cunugaada Kooxda (IEP) tixgeliyay iyo asbaabta talooyinkaas loo diiday.
3. Sharaxaad ku saabsan habka qiimeyn kasta, baaris, diiwaan, ama warbixinta qeybta maamulka u isticmaashay, aasaas ahaan, falka la soo jeediyay ama la diiday; iyo
4. Sharaxaad ku saabsan qodobada kale ee munaasabka u ah falka ay soo jeedisay ama diiday qeybta maamulka.

Bixinta macluumaadka qodobada 1- 4 kore kama reebto qeybta maamulka in ay ku adkeysato in ashtakadaada habka sharciga ahayd mid aan ku filneyn.

Jawaabta dhinac saddaxaad ka bixiyo ashtakada habka sharciga

Marka laga reebo sida la sheegay ee hoos timaada qeybta kore, **jawaabta Qeybta Maamulka ka bixiso ashtakada habka sharciga**, dhinaca qaato ashtakada habka sharciga waa in uu dhinaca kale, muddo 10 maalmaha jadwalka gudaheeda laga bilaabo marka uu helo ashatakada, u diro jawaab oo si cayiman uga hadasha mid kasta oo ka mid ah arrimaha ku jira ashtakada.

MEELEYNTA CUNUGGA INTA LA SUGAAYO ASHTAKADA IYO DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA

34 CFR §300.518

Marka laga reebo sida ku qoran hoos qeybta **HABABKA MARKA LA EDBINAAYO CARUURTA ITAALKA DARAN**, marka ashtakada habka sharciga loo diro dhinaca kale, muddada hawsha xallinta, iyo inta la sugaayo go'aanka dhageysiga habka sharciga ama dacwadda maxkamadda, haddii adiga iyo qeybta maamulka aadan ku heshiinin si kale, cunugaada waa in uu ku sugnaado meeleynta waxbarashada iminka u socoto.

Haddii ashtakada habka sharciga ku lug leedahay arji loo qorto dugsiga dadweynaha oo ku saabsan ogolaasho hore, cunugaada, isaga/iyada oo haysata ogolaashadaada, waa in lagu meeleeyo barnaamijka dugsiga dadweynaha caadiga ah ilaa ay ka dhamadaan dhamaan dacwadaha noocaas ah.

Haddii ashtakada habka dacwadda ku lug leedahay arji ku saabsan adeegyada hore sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA lana siiyo cunug ka wareega in loo adeego sida hoos timaado Qeybta C ee IDEA ilaa Qeybta B ee IDEA, kaasoo aan xaq u lahayn adeegyada Qeybta C maxaa yeelay cunugga wuxuu gaaray saddax sanno, qeybta maamulka lagama rabo in ay bixiso adeegyada Qeybta C uu cunugga qaadanaayay. Haddii la arko in cunugga uu xaq u leeyahay sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA, aadna u ogolaatid in cunugga uu qaato waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira marka kowaad, markaas, iyadoo la sugaayo natiijada dacwadda, qeybta maamulka waa in ay bixiso adeegyada waxbarashada khaaska ah iyo kuwa la xariira ee aan qilaafka ku jirin (kuwa adiga iyo qeybta maamulka aad ku heshisaan.)

Haddii garsooraha sharciga maamulka ee ku hawlan dhageysiga habka sharciga ay CDE fullisay kugu waafaqo adiga in baddalaadda meeleynta habboon tahay, meeleyntaas waa in loo arko sida meeleynta waxbarashada iminka u socoto cunugaada halkaas uu cunugaada ku sugnaan doono inta uu sugaayo go'aanka dhageysiga habka sharciga ama dacwadda maxkamadda.

FOOMAMKA CAADIGA

CFR §300.509

CDE waa in ay soo saarto foomamka caadiga oo adiga kugu kaalmeeyo ashtakada habka sharciga iyo ashtakada Gobolka. Hase ahatee, CDE ama qeybta maamulka kaama rabto in aad isticmaashid foomamkaan caadiga. Dhab ahaan, waxaad isticmaali kartaa foomkaan ama foom kale oo caadi ah oo ku haboon, ilaa laga helo macluumaadka loo baahan yahay si loo soo gudbiyo ashtakada habka sharciga ama ashtakada Gobolka.

Foomamka caadiga ee CDE ee loo isticmaalo Ashtakooyinka Gobolka, Ashtakooyinka Habka Sharciga iyo Dhexdhexaadinta waxaa laga heli karaa CDE marka la waco Qeybta Hoggaanka Ardayga Aan Caadiga Ahayn (Exceptional Student Leadership Unit), telefoonka (303)866-6694 ama marka la tago bogga internetka Xallinta Qilaafka (Dispute Resolution) ee CDE: http://www.cde, state.co.us/spedlaw/info.htm.

DHEXDHEXAADINTA

34 CFR §300.506

Guud

Waxaa la heli karaa dhexdhexaadinta si aad adiga iyo qeybta maamulka u xallisaan qilaafkiina ku lug leh xaajo kasta ee hoos timaada Qeybta B ee IDEA, kana mid ah arrimaha soo baxa ka hor inta aan la soo gudbinin ashtakada habka sharciga. Sidaas darteed, waxaa la heli karaa dhexdhexaadin si loo xalliyo qilaafaadka hoos yimaada Qeybta B ee IDEA, haddii aad soo gudbisay ama haddii aadan soo gudbinin ashtakada habka sharciga.

Waxa loo baahan yahay

Hababka waa in ay hubsadaan in habka dhexdhexaadinta:

1. tahay mid aad adiga iyo qeybta maamulka u gaarteen iskiina;
2. aan loo isticmaalin in la diido ama lagu daahiyo xaqa aad u leedahay dhageysiga habka sharciga, ama in lagu diido xuquuq kale aad leedahay sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA; iyo
3. uu fulliyo dhexdhexaadiye aqoon leh kaasoo tababar ku soo qaatay farsamada dhexdhexaadinta.

Qeybta maamulka waxay soo saari kartaa habab siiya waalidiinta iyo dugsiyada doortay in aysan isticmaalin hawsha dhexdhexaadinta, fursad aad kula shirted, waqti iyo goob ku roon adiga, lana kulantid dhinac aan dan gaar ah lahayn:

1. Oo kunturaad ka haysta hay'ad ka shaqeysa xallinta qilaafka, ama tababarka waalidka iyo xarunta macluumaadka ama xarunta ilaha waalidka bulshada ee Gobolka; **iyo**
2. Oo sharaxa manafacaadka iyo dhiiri geliya isticmaalka habka dhexdhexaadinta.

CDE waxay haysaa liiska dadka aqoonta u leh dhexdhexaadinta oo ogsoon sharciyada iyo xeerka la xariira bixinta waxbarashda khaaska iyo adeegyada la xariira. Dhexdhexaadiyeyaasha waxaa hawsha loo siiyaa si aan kala sooc lahayn, wareegto ah, ama siyaabo kale oo aan eex ku jirin.

CDE waxay mas'uul ka tahay kharashka dhedhexaadiyaha. Shir kasta oo ku saabsan waa in loo qabto waqti munaasab ah laguna qabto meel kuu roon adiga iyo qeybta maamulka.

Haddii adiga iyo cqeybta maamulka dhamaysataan qilaafka idinka oo adeegsada habka dhexdhexaadinta, labada dhinacba waa in ay galaan heshiis qoran oo sharci ah, kaasoo:

1. Soo bandhiga dhamaan heshiisyada idin dhex maray adiga iyo qeybta maamulka.
2. Sheega in dhamaan wada hadalada dhacay inta ay socotay dhexdhexaadinta ahaan doonaan kuwo asturan loona isticmaali karin sida caddeyn loo adeegsada dhageysiysada habka sharciga ama dacwadaha madaniga; iyo
3. Aad saxiixdaan adiga iyo wakiil ka socda qeybta maamulka kaasoo awood u leh in uu heshiis ku galo magaca qeybta maamulka.

Heshiis qoran, la saxiixay, oo ku saabsan dhexdhexaadinta waxaa laga hirgelin karaa maxkamadaha Gobol kasta ee u leh awoodda sharciga (maxkamad awood u leh sida hoos timaado sharciga Gobolka in ay dhageysato kiiska noocaan) ama maxkamadda dagmada ee Waddanka Mareykanka.
Wada haddalada dhacay inta ay socotay hawsha dhexdhexaadinta waa in ay ahaddan kuwo asturan. Looma isticmaali karo sida cddeyn dhageysiyada habka sharciga ama dacwadaha madaniga ee maxkamadaha Federaalka ee Gobol kaalmo qaata sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA.

Dhexdhexaadnimada dhexdhexaadiyaha

Dhexdhexaadiyaha:

1. ma noqon karo shaqaale ka tirsan CDE ama qeybta maamulka ku lugta leh waxbarashda ama daryeelka cunugaada; **iyo**
2. Waa in uusan shakhsi ahaan ama danno ka lahayn oo ka hor yimaado aragtida dhexdhexaadiyaha.

Dhexdhexaadiyaha loo xil saaray ma aha shaqaale ka tirsan CDE oo keliya maxaa yeelay adeegyadooda waxaa bixiya CDE.

HABKA XALLINTA

34 CFR §300.510

Shirka xallinta

Muddo 15 maalmaha jadwalka gudahooda laga bilaabo ogeyssiska ashtakadaada habka sharciga, iyo ka hor inta uusan bilaabanin dhageysiga habka sharciga, qeybta maanmulka waa in ay kula shirto adiga iyo xubinta munaasab ka ah ama xubnaha barnaamijka waxbarashada lagu soo koobay shakhsiga Kooxda (IEP) oo aqoon cayiman u leh xaqiiqada lagu aqoonsaday ashtakadaada habka sharciga. Shirka:

1. Waa in uu joogo wakiil ka socda qeybta maamulka oo awood u leh in uu magaca qeybta maamulka ku gaari karo go'aan; **iyo**
2. Waa in uusan joogin qareenka qeybta maamulka haddii adiga uusan kula soconin qareen.

Adiga iyo qeybta maamulka waxaad go'aansan kartiin xubnaha munaasabka ah ee Kooxda IEP si aat u tagtaan shirka.

Ujeedada shirka waa in aad adiga ka haddashid astakada habka sharciga, iyo xaqiiqadaha aasaaska u ah ashtakada, si qeybta maamulka u hesho fursad ay ku xalliso qilaafka.

Muddada xalllinta

Haddii qeybta maamulka uusan xallinin ashtakada habka sharciga ilaa aad ka qanacdid muddo 30 maalmaha jadwalka laga bilaabo marka aad heshid ashtakada habka sharciga (inta ay socoto hawsha xallinta), waxaa dhici karto in la qabto dhageysiga habka sharciga

Waqtiga 45ta maalmaha jadwalka oo lagu soo saaro go'aanka ugu dambeeyo wuxuu bilowdaa maalinta ay dhacdo muddada xallinta ee 30ka maalmaha jadwalka, sida ku sharaxan hoos.

Marka laga reebo marka adiga iyo qeybta maamulka ku heshisaan in aad iska dhaaftaan hawsha xallinta ama aad isticmaashaan dhexdhexaadinta, in aadan tagin shirka dhexdhexaadinta waxay gadaal u dhigi doontaa waqtiga hawsha xallinta iyo dhageysiga habka sharciga ilaa aad ka ogolaatid in aad ka qeybgashid shirka xallinta.

Kaddib marka aad sameysid dadaal macquul ah aadna raad ka reebtid dadaalkaas, haddii qeybta maamulka aysan awoodin in ay hesho ka qeybgalkaada shirka xallinta, qeybta maamulka waxay, marka la gaaro dhamaadka muddada xallinta 30ka maalmaha jadwwalka, codsan kartaa in ALJ meesha ka saarto ashtakadaada habka sharciga . Warqadaha dadaalka noocaas waa in lagu daro qoraal ku saabsan dadaalka qeybta maamulka qabatay si ay u qorsheyso waqtiga labada dhinac ku heshiyaan iyo gobta, sida:

1. Qoraal tafatiran oo ku saabsan telefoonada la diray ama leysku dayay iyo natiijadaha ka soo baxay telefonadaada la diray;
2. Koobiyada warqadaha leys dhaafsaday ee laguu soo diray iyo jawaabaha aad hehay; iyo
3. Qoraal tafatiran oo ku saabsan booqashooyinka lagu tagay gurigaada ama meesha aad ka shaqeysid iyo natiijadaha ka soo baxay booqashooyinkaas.

Haddii adiga ama qeybta maamulka ku heshisaan qoraal ahaan in aad iska dhaaftaan shirka xallinta, muddo 15 maalmaha jadwalka gudahooda, laga bilaabo marka aad heshid ogeysiiska ashtakada habka sharciga ama ku guul dareysto in uu ka

qeybgalo xallina shirka, waxaad ALJ weydiisan kartaa in ay amar ku bixiso in la bilaabo dhageysiga habka sharciga ee 45ta maalmaha jadwalka.

Isku celcelinta lagu sameeyo muddada xallinta ee ah 30ka maalmaha jadwalka

Haddii adiga iyo qeybta maamulka, qoraal ahaan, ku heshisaan in aad iska dhaaftaan shirka xallinta, markaas waxaa maalinta xigta la bilabaa dhageysiga habka sharciga ee 45ta maalmaha jadwalka.

Kaddib marka la bilaabo dhexdhexaadinta ama shirka xallinta iyo ka hor inta aan la gaarin dhamaadka muddada xallinta, 30ka maalmaha jadwalka, haddii adiga iyo qeybta maamulka aad, qoraal ahaan, ku heshisaan in aysan suurtogal ahayn in la gaaro heshiis, markaas waxaa maalinta xigta bilowda dhageysiga habka sharciga, 45ta maalmaha jadwalka.

Haddii adiga iyo qeybta maamulka ku heshisaan in aad isticmashaan habka dhexdhexaadinta, marka la gaaro dhamaadka muddada xallinta ee 30ka maalmaha jadwalka, labada dhinacba waxaad, qoraal ahaan, ku heshiin kartiin in aad sii wadiin dhexdhexaadinta ilaa laga gaaro heshiis. Hase ahatee, haddii adiga ama qeybta maamulka ka noqotaan habka dhexdhexaadinta, markaas waxaa maalinta xigta bilowda 45ta maalmaha jadwalka ee dhageysiga habka sharciga.

Heshiiska qoran ee lagu dhameeyo

Haddii heshiis laga gaaro qilaafka inta uu socdo shirka xallinta, adiga iyo qeybta maamulka waa in aad gashaan heshiis qoran oo sharci ahaan waajib idinku ah, kaasoo:

1. Aad saxiixdid adiga iyo wakiilka qeybta maamulka ee awoodda u leh in uu mattalo qeybta maamulka; **iyo**
2. Laga hirgelin karo maxkamadaha Gobalada, uu hoos yimaado (maxkamadda Gobolka ee awoodda u leh in ay dhagysato kiiska noocaan) ama maxkamadda dagmada Mareykanka.

Muddada Fiirinta Heshiiska

Haddii adiga iyo qeybta maamulka wada gashaan heshiis, kaasoo ka dhasha shirka xallinta, dhinac kasta (adiga ama qeybta maamulka) waxaad burin kartiin heshiiska muddo sadda maalin shaqeeyo gudahooda laga bilaabo marka adiga iyo qeybta maamulka aad saxiixdeen heshiiska.

DHAGEYSIYADA KU SAABSAN ASHTAKOOYINKA HABKA SHARCIGA

DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA AAN DHINACNA LA JIRIN

Guud

Mar kasta oo la soo gudbiyo ashtakada habka sharciga, adiga ama qeybta maamulka ee ku lugta leh qilaafka waa in aad fursad u heshaan dhageysiga habka sharciga ee aan eexda lahayn, sida ku sharaxan qeybaha **Ashtakada Habka Sharciga** iyo **Hawsha Xallinta**.

Wakaaladda mas'uul ka ah fullinta dhageysiga habka sharciga.

Dhageysiga lagu sharaxay qeybtaan waan in ay fulliso Waaxda Waxbarashada Colorado (Colorado Department of Education) (CDE) iyadoo adeegsaneyso garsooraha sharciga maamulka ee sida wareegtada ah loo xil saaro.

Garsooraha sharciga maamulka (ALJ)

Ugu yaraan, ALJ waa:

1. In uu ahaado shaqaale ka tirsan CDE ama qeybta maamulka ee ku lugta leh waxbarashada iyo daryeelka cunugga;
2. In uusan ka lahayn dan shakhsi ama aqoon oo qilaafsan ujeedada ALJ xagga dhageysiga;
3. In uu aqoon u leeyahay iyo waa in uu fahamsan yahay qodobada IDEA, iyo sharciyada Federaalka iyo Gobolka ee la xariira IDEA, iyo tarjumada sharciga ah ay maxkamadaha Federaalka iyo Gobolka ka sameyaan; iyo
4. In uu aqoon iyo awood u leeyahay fullinta dhageysiyada, iyo in uu gaaro iyo in uu qoro go'aanada, sida waafaqsan heerka dhaqanka sharciga ku habboon.

CDE waa in ay hayso liiska shakhsiyaadka u shaqeeyo sida ALJyada taasoo aga helo oraah ku saabsan aqoonta ALJ kasta.

Xaajada dhageysiga habka sharciga

Inta uu socdo dhageysiga habka sharciga, dhinaca (adiga ama qeybta maamulka) weydiista dhageysiga habka sharciga ma soo jeedin karo arrimo aan looga hadlin ashtakada habka sharciga, haddii dhinaca kale uusan ogolaanin.

Waqtiga la codsado dhageysiga

Adiga ama qeybta maamulka waa in aad codsataan dhageysiga aan eexda lahayn ee la xariira ashtakada habka sharciga muddo labo sanno gudaheeda laga bilaabo taariikhda aad adiga ama qeybta maamulka aad ogaateen ama ay ahayd in aad ogataan arrinta lagu soo jeediyay ashtakada.

Waxyaabaha ka reeban waqtiga

Jadwalka kor ku qoran laguuguma dabaqi karo adiga haddii aadan soo gudbinin ashtakada habka sharciga maxaa yeelay:

1. Qeybta maamulka ayaa si cayiman oo khaldan u soo bandhigay in ay xallisay dhibaatada ama arrinta aad adiga ku soo jeedisay ashtakada; **ama**
2. Qeybta maamulka ayaa kaa reebatay macluumaad loo baahna in lagu siiyo adiga sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA.

XUQUUQDA DHAGEYSIGA

34 CFR §300.512

Guud

Waxaad xaq u leedahay in aad naftaada mattashid dhageysiga habka sharciga. Dhinac kasta oo ku jirta dhageysiga habka sharciga (kana mid ah dhageysi la xariira hababka dishibiliinka) ama racfaan, sida ku sharaxan qeybta ku magacaaban **Racfaanka laga qaato go'aanada; fiirinta aan eexda lahayn** wuxuu xaq u leeyahay in uu:

1. La socdo iyo in uu la taliyo qareen iyo/ama dad leh aqoon khaas ah ama tababar ku saabsan dhibatooyinka caruurta itaalka darran, marka laga reebo in Gobolka Colorado qareen oo shatti kaa haysta Maxkamadda Sare Colorado (Colorado Supreme Court) oo keliya uu mattali karo dhinac xagga dhageysiga habka sharciga;
2. Soo bandhigo caddeyn iyo in uu ka hortago, si dadban u baaro, iyo in uu dalbado marqaatiyo;
3. Mamnuuc ka dhigo soo gelinta caddeyn inta uu socdo dhageysiga oo aan la tusin dhinac kale ugu yaraan shan maalmaha la shaqeeyo ka hor inta aan la qabinin dhageysiga;
4. Helo qoraal eray-eray u qoran, ama, sida aad doontid, elataroonig, oo ku saabsan dhageysiga; iyo
5. Helo qoraalka natiijada, ama, sida aad doontid, elataroonig oo ku saabsan xaqiiqada iyo go'aanada.

Kashifaad dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadka

Ugu yaraan shan maalmaha la shaqeeyo ka hor inta aan la qabin dhageysiga habka sharciga, adiga iyo qeybta maamulka waa in aad isu kashaftaan dhamaan qiimeynta la soo dhamaystiray ilaa taariikhdaas iyo talooyinka la soo jeediyay sida ku saleysan qiimeeynta aad adiga ama qeybta maamulka ku talo jirtaan in aad adeegsataan dhageysiga.

Waxaa dhici karto in ALJ uu hor istaago dhinaca ku guul dareysata in ay u hoggaansanto sharcigaan in ay soo geliyso qiimeynta quseyso ama talada la soo jeediyo inta uu socdo dhageysiga iyadoo aan ogolaasho laga haysanin dhinaca kale.

Xuquuqda waalidka xaga dhageysiga

Waa in lagu siiyo xaqa aad u leedahay in:

1. Cunugaada oo ah qofka laga hadlaayo in uu joogo;
2. Dhageysiga loo furo dadweynaha; **iyo**
3. Lagu siiyo qoraalka dhageysiga, natiijadaha ka soo baxay xaqiiqada iyo go'aanaada.

GO'AANADA DHAGEYSIGA

34 CFR §300.513

Go'aanka Garsooraha Maamulka Sharciga (GARSOORAHA SHARCIGA MAAMULKA)

Go'aanka ALJ ee ku saabsan haddii cunuggaada uu helay waxbarashada dadweynaha lacag la'aanta ah ee ku habboon (FAPE) waa in lagu saleeyo aasaas la taaban karo.

Marka la soo sheego in la jebiyay nidaamka, waxaa dhici karto in ALJ go'aansato in cunugaada aan la siinin waxbarashada dadweynaha lacag la'aanta ah ee ku habboon (FAPE) oo keliya haddii ku filnaasho la'aanta nidaamka:

1. Soo faragelisay xaqa cunugaada u leeyahay FAPE;
2. Si la taaban karo u soo faragelisay fursadda aad u leedahay in aad ka qeybgashid habka go'aan gaarista ku saabsan in cunugaada la siiyo FAPE; ama
3. Sababtay in aan la siinin manafacaadka waxbarashada.

Qodobada kor lagu sharaxay looma tarjumi karo in ALLJ laga hor istaago in ay qeybta maamulka ku amarto in ay u hoggaansanto sharuudaha ku jira qeybta ammaanka nidaamka ee sharciyada Federaalka hoos yimaado Qeybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ILAA 300.536).

Codsiga gaarka ah ee lagu dalbado dhageysiga habka sharciga

Ma jiro wax ku jira qeybta amaanka nidaamka ee sharciyada Federaalka hoos yimaada Qeybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ILAA 300.536) oo loo tarjumi karo in lagaa hor istaago soo gudbinta ashtakada habka sharciga xagga arrim gaar ka ah ashtakada habka sharciga ee horay loo soo gudbiyay.

Natiijada iyo go'aanka ku wajahan guddiga la-talinta waxbarashada khaaska ah ee Gobolka iyo dadweynaha guud

CDE kaddib marka ay tirtirto macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka, waa in ay:

1. Natiijadaha iyo go'aanka u gudbiso guddiga la-talinta waxbarashada khaaska ah ee Gobolka; **iyo**
2. In dadweynaha ay heli karaan natiijadahaan iyo go'aanka.

KAMA DAMBEYNTA GO'AANKA

34 CFR §300.514

Kama dambeynta go'aanka dhageysiga

Go'aanka lagu gaaro dhageysiga habka sharciga (sida dhageysiga la xariira hababka dishibiliinka) waa kama dambeys, marka laga reebo dhinac (adiga ama qeybta maamulka) ee ku lugta leh dhageysiga waxaad racfaan ka qaadan kartiin go'aanka kaddib marka aad soo jeedisaan dacwad madani ah, sida ku sharaxan hoos meesha ku hooseyso: **Dacwadaha Madaniga, Kana Mid Ah Muddada loo Baahan Yahay in La Soo Gudbiyo Dacwadahaas.**

WAQTIYADA MUNAASABKA AH IYO ROONAANTA DHAGEYSIYADA

34 CFR CFR §300.515

Qeybta maamulka waa in ay hubsato in ugu badnaan 45 maalin kaddib marka ay dhamaato muddada 30ka maalin ee lagu qabto shirarka xallinta ama, sida ku sharaxan ee hoos timaada qeybta **Isku Celceliska muddada jadwalka 30ka maalin muddada xallinta,** ugu badnaan 45 maalmaha la shaqeeyo kaddib marka ay dhacdo muddada isku celceliska;

1. In go'aan kama damabays ah laga gaaro dhageysiga habka sharciga, iyo
2. In koobiga go'aanka boostada loogu soo diro adiga iyo qeybta maamulka.

Dhageysiyada habka sharciga ee ku lugta leh doodaha laga soo jeediyo afka waa in la qabt waqti laguna qabto meel oo si macquul ah kuu roon adiga iyo cunugaada.

DACWADAHA MADANIGA, SIDA MUDDADA LOO BAAHAN YAHAY IN LA SOO GUDBIYO DACWADAHAAS

34 CFR §300.516

Guud
Dhinac kasta (adiga ama qeybta maamulka) ee aan raali ku noqonin natiijadaha iyo go'aanada ALJ xagga dhageysiga habka sharciga (kana mid ah dhageysiga habka sharciga la dadajiyo ee la xariira talaabadaha dishibiliinka) waxay xaq u leedahay in ay soo oogto dacwad madani ah oo ku saabsan xaajada hor taala dhageysiga habka sharciga. Dacwadda waxaa laga soo jeedin karaa maxkamadda Gobolka ee awoodda sharciga u leh (maxkamadda Gobolka ee awoodda u ley in ay dhageysato kiiska noocaan) ama maxkamadda dagmada ee Waddanka Mareykanka iyadoo aan la fiirinin xisaabta leysku haysto.

Xadidaadda Waqtiga
Dhinaca soo jeediyaya ashtakada habka sharciga asalka (adiga ama qeybta maamulka) ama dhinaca ka jawaaba ashtakada waxaa la siin doonaa ugu badnaan 90 maalmaha jadwalka laga bilaabo taariikhda go'aanka ALJ ay ku soo gudbiso dacwadda madaniga.

Hababka dheeraadka ah
Dacwada kasta oo madani ah, maxkamadda:
1. Ayaa la siiyaa diiwaanka maamulka dacwadda
2. Ayaa dhageysata caddeynta dheeraadka ah kaddib marka aad adiga ama qeybta maamulka soo codsataan; ***iyo***
3. Waxay go'aankeeda ku saleysa badnaanta caddeynta, waxay bixisa garta ay u aragto in ay ku habboon tahay.

Awoodda maxkamadaha dagmada

Maxkamadaha dagmada ee Mareykanka waxay awood u leeyahiin in ay go'aan ka gaaraan dacwadaha la hor keeno ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA iyadoo aan la fiirinin xisaabta leysku haysto.

Sharciga habeynta – ka sal gaaridda

Ma jirto qeyb ka tirsan Qeybta B ee IDEA oo xanibta ama xadidda xuquuqda, hababka, iyo waxyaabaha laga qaban karo sida hoos timaado Dastuurka Mareykanka, Sharciga Mareykanka Itaalka Darran (Americans with Disabilities Act) ee 1990, Qeybta V ee Sharciga Dayactirka (Rehabilitatain Act) ee 1973 (Qeybta 504), ama sharciyada kale ee Federaalka ee badbaadiya xuquuqda caruurta itaalka darran, marka laga reebo in ka hor inta aan la soo gudbinin dacwadda madaniga ee hoos yimaada sharciyadaan iyadoo la raadsanaaya garta la heli karo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, waa in la dhameeyo hababka sharciga kor lagu sharaxay ilaa laga gaaro heerka sida la dooni lahaa haddii dhinaca soo jeediya dacwadda hoos timaada Qeybta B ee IDEA. Tan macnaheeda waxay tahay in inkastoo adiga aad heli kartid wax-ka-qabasho sida hoos timaada sharciyo kale oo la mid ah sida kuwa hoos yimaada IDEA, guud ahaan, ka hor inta aan dacwadda madaniga loo gudbinin maxkamadda iyadoo la raadsanaaya gar sida hoos timaado sharciyadaas, marka hore waa in aad adeegsatid waxyaabaha maamulka kuu qaban karo ee hoos yimaada IDEA (kuwasoo ah ashtakada habka sharciga, shirka xallinta, iyo hababka dhageysiga habka sharciga ee aan eexda ku jirin).

KHIDMADAHA QAREENKA

34 CFR §300/517

Guud

Talaabo kasta ama dacwad kasta oo la soo jeediyo sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA, haddii aad ku guuleysatid (raydid), waxaa dhici karto in maxkamadda, hadba sida ay doonto, in ay amarto khidmadaha qareenka ee macquulka ah, taasoo qeyb ka ah kharashka lagaa rabo adiga.

Talaabo kasta oo la qaado ama dacwad kasta oo hoos timaado Qeybta B ee IDEA, maxkamadda (taasoo ah, maxkamadda Gobolka ama dagmada), hadba sida ay u garato, waxay amri kartaa in la bixiyo khidmadaha macquulka ah ee qareenka kuwasoo qeyb ka ah kharashka la siiyo Wakaaladda Waxbarashada Gobolka (State Educational Agency) ama qeybta maamulka, loona baahan yahay in qareenkaada uu bixiyo, haddii qareenka: (a) uu soo gudbiyay ashtako ama kiis u soo gudbiyay maxkamadda, una aragto maxkamadda in uu yahay waqti lumis, wax aan macquul ahayn, ama aan aasaas lahayn; ama (b) sii waday in uu ka sii murmo kaddib marka muranka si caddaan ah u noqday waqti lumis, wax aan macquul ahayn, ama aan aasaas lahayn: **ama**

Talaabo kasta ama dacwad oo hoos timaado Qeybta B ee IDEA, maxkamadda (taasoo ah maxkamadda Gobolka ama dagmada), hadba sida ay u garato, waxay amri doontaa in la bixiyo khidmadaha qarenka taasoo qeyb ka ah kharashka la siiyo Wakaaladda Waxbarashada Gobolka (State Educational Agency) ama qeybta maamulka, loona baahan yahay in aad adiga bixisid ama in uu bixiyo qareenkaada, haddii codsigaada ku saabsan dhageysiga habka sharciga ama dacwadaada madaniga ah ee aad soo jeedisid goor dambe in laga lahaa ujeedo aan haboneyn, sida in lagu kadeedo, la sababo dib u dhac aan loo baahneyn, ama si aan loo baahneyn loo kordhiyo kharashka ku baxa dacwadda.

Bixinta khidmadaha

Maxkamadda waxay amartaa in la bixiyo khidmadaha qareenka sida soo socoto:

1. Khidmadaha waa in ay ku saleysan yahiin sicirka ka jira bulshada, meesha laga abaabulay talaabada ama dhageysiga xagga nooca iyo tayada adeegyada la bixiyay. Lama isticmaali karo gunno ama badiye marka la xisaabaayo khidmadaha la bixiyo.
2. Lama bixin karo khidmadaha qareenka iyo lama soo celin karo kharashka la xariira xagga talaabo kasta ama dacwad kasta oo hoos timaado Qeybta B ee IDEA xagga adeegydada la qabtay kaddib marka lagu soo jeediyo talo qoran haddii:
    a. Talada la soo jeediyo waafaqsan tahay waqtiga u qoran Sharciga 68 ee Sharciyada Federaalka ee Dacwadaha Madaniga (Federal Rules of Civil Procedure) ama, marka kiiska ku saabsan yahay dhageysiga habka sharciga, waqti kasta oo ka badan 10 maalmaha caadiga ka hor inta dacwadda aysan bilaabanin;

b. Talada aan la ogolaanin muddo 10 maalmaha la shaqeeyo gudahooda; iyo
c. Maxkamadda ama ALJ ogaato in garta aad adiga ugu dambeyntii heshay in aysan ahayn mid kuu roon adiga marka la barbar dhigo talada heshiiska.

Inkastoo ay jiraan xuduudaas, waxaa dhici karto in la amro in lagu siiyo khidmadaha qareenka iyo kharashka la xariira haddii aad ku guuleysatid, aadna sabab jirta u haysatay in aad diidid heshiiska la soo jeediyay.

3. Lama amri karo in la bixiyo khidmadaha la xariira shirka barnaamijka waxbarashada ku kooban shakhsiga Kooxda (IEP) haddii shirka uusan ka dambeynin dacwadda maamulka ama talaabada ay qaado maxkamadda. Lama amri karo in la bixiyo khidmadaha ku saabsan dhexdhexaadinta sida ku sharaxan ee hoos timaada qeybta **Dhexdhexaadinta (Mediation)**.

   Shirka xallinta, sida ku sharaxan qeybta Habka Xallinta (Resolution Process), looma haysto in uu yahay shir la soo qaban qaabiyay kana dhashay dhageysiga maamulka ama talaabada maxkamadda, mana loo haysto shir dhageysiga maamulka ama talaabo ay qaaday maxkamadda xagga sharciyada ku saabsan khidmadaha qareenka.

Maxkamadda waxay hoos u dhigtaa, sida ku habboon, xisaabta khidmadaha qareenka la amro in la bixiyo sida hoos hoos timaado Qeybta B ee IDEA, haddii maxkamadda go'aansato in:

1. adiga, ama qareenkaada, inta ay socotay talaabada ama dacwadda, si aan macquul ahayn dib u dhigteen xallinta kama dambaysta ah ee qilaafka;
2. Xisaabta khidmadaha qareenka oo la amray in la bixiyo si aan macquul ahayn uga badan yahay sicirka saacadii kajira bulshada xagga adeegyada la midka ah marka la barbar dhigo qareenada sida macquulka ah qaba xirfad la mid ah, magac, iyo waayo arag;
3. Waqtiga ku baxa iyo adeegyada sharciga ee la siiyo waxay ahayeen xad dhaaf marka la fiiriyo waxa talaabada la qaaday ama dacwadda tahay; **ama**
4. Qareenka ku mattala uusan qeybta maamulka siinin macluumaadka ku habboon xagga codsiga ogeysiiska habka sharciga ee hoos yimaada **Dhageysiga Habka Sharciga**.

Hase ahatee, maxkamadda ma yareyn karto khidmadaha haddii maxkamadda ogaato in Gobolka ama qeybta maamulka ay si aan macquul ahayn dib u dhigeen xallinta ugu dambeyso talaabada ama dacwadda ama la jebiyay sida hoos timaado sharciyada ammaanka ee Qeybta B ee IDEA.

HABABKA MARKA LA EDBINAAYO CARUURTA ITAALKA DARRAN

AWOODDA SHAQAALAHA DUGSIGA

34 CFR §300.530

Go'aanka hadba sida kiisku yahay

Shaqaalaha dugsiga waxay tixgelin karaan xaaladaha gaarka ah hadba sida kiisku yahay, marka ay go'aan ka gaaraan haddii isbaddalka lagu sameeyay meeleynta, sida waafaqsan sharuudaha soo socdo ee la xariira dishibiliinka, ahayeen kuwo ku habboon cunugga itaalka darran ee jebiya xeerka dugsiga ku saabsan aadaaba dugsiga.

Guud

Ilaa xadka in talaabada noocaas ah ay ka qaadaan caruurta aan itaalka darneyn, shaqaalaha dugsiga waxay, muddo ka yar 10 maalin dugsiyeed oo xariira, ka saari karaan cunugga itaalka darran ee jebiya xeerka aadaabta ardayga, meesha uu iminka ku meeleysan yahay, waxayna geyn karaan waxbarasho kale oo ku meel gaar ah (oo loo baahan yahay in ay go'aansadaan barnaamijka waxbarashada ku kooban cunugga Kooxda (IEP), meel kale, ama ka joojin ilaa muddo. Shaqaalaha dugsiga waxay kaloo saari karaan ka saarid dheeraad ah cunugga muddo aan ka badneyn 10 maalin dugsiyeed

oo isku xiga isla sannad dugsiyeedkaas xagga dhacdooyinka gaarka ah ee ku saabsan aadaab darro, hase ahatee, ka saaridaas waa in aysan ahayn isbaddal lagu sameeyo meeleynta [si aad u heshid sifeynta, fiiri hoos **Baddalka Meeleynta Ugu Wacan Ka Saaridda Dishibiliinka (Change of Placement Because of Disciplinary Removals**)]

Marka cunugga itaalka darran laga saaro meesha uu iminka meeleysan yahay wadarta muddo 10 maalin dugsiyeed isla sannad dugsiyeedka, qeybta maamulka waa in ay siiso adeegyo, muddada maalmaha kale ee laga saaro sannad dugsiyeedkaas, ilaa inta ay baahan tahay qeybta hoose ee ku magacaaban **Adeegyada (Services).**

Awoodda dheeraadka ah

Haddii dabeecadda jebisay xeerka asluubta ardayga aysan ahayn wax muujiya itaal darrida cunugga (fiiri hoos sida loo go'aamiyo Muujinta) iyo marka isbaddalka dishibiliinka meeleynta ka badato 10 maalin dugsiyeed isku xiga, shaqaalaha dugsiga waxay hababka dishibiliinka ku dabaqi karaan cunugaas qaba itaal darri isla sida iyo isla waqtiga sida caruurta aan qabin itaal darrida, marka laga reebo in dugsiga ay waajib ku tahay in uu adeegyo siiyo cunugaas sida ku sharaxan hoos Adeegyada. Kooxda IEPda cunugga waxay go'aan ka gaaraan habka waxbarashada kale ee ku meel gaarka ah ee loo sameeyay adeegyada noocaas ah.

Adeegyada

Adeegyada loo baahan yahay in la siiyo cunugga itaalka darran ee laga saaray meesha uu cunugga iminka ku meeleysan yahay waxaa lagu siin karaa habka waxbarashada kale ee ku meel gaarka ah.

Waxa keliya laga rabo qeybta maamulka waa in ay adeegyo siiso cunugga itaalka darran ee laga saaray meesha uu iminka ku meeleysan yahay muddo 10 maalin dugsiyeed ama ka yar isla sannad dugsiyeedkaas, haddii ay adeegyo siiso cunug aan qabin itaal darri oo isla sidaas looga saaray. Colorado, ardayda aan qabin itaal darrida ee laga saaray mudd gaaban oo ka joojin ah, caado ahaan, lama siiyo adeegyo muddada ka-joojinta. Hase ahatee, madaxda ka joojisay waa in ay arday kasta siyaan fursad ay gadaal ka sameyaan shaqada la bixiyay waqtiga ka-joojinta, si ardayga loogu daro barnaamijka waxbarashada ee ka dambeeyo muddada ka-joojinta. Qeybta 22-33-105(3)(d)(111), C.R.S.

Cunugga itaalka darran ee laga saaray meesha uu iminka ku meeleysan yahay in ka badan 10 maalin dugsiyeed waa in uu;

1. Sii wado in uu qaato adeegyada waxbarashada, si cunugga uu yeesho awood uu ku sii wado in uu ka qeybgalo manhajka waxbarashada guud, in kastoo lagu qaato meel kale, iyo in uu horumar ku sameeyo la kulanka ujeedooyinka ku qoran IEPda cunugga; **iyo**
2. Qaato, sida ku habboon, qiimeynta dabeecadda uu ku shaqeeyo, iyo adeegyada faragelinta dabeecadda iyo isbaddalada, ee loo sameeyay in wax looga qabto jebinta dabeecadda si aysan mar kale u dhicin.

Kaddib marka cunugga itaalka darran laga saaro meesha uu iminka ku meeleysan yahay muddo 10 maalin dugsiyeed isla sannad dugsiyeedkaas, iyo haddii ka-saaridda iminka socota tahay muddo 10 maalin dugsiyeed oo isku xiga ama ka yar iyo haddii ka-saaridda aysan isbaddal lagu sameeyo meeleynta (hoos ka fiiri sifeynta), markaas shaqaalaha dugsiga, iyaga oo kaashanaaya ugu yaraan hal ka mid ah macalimiinta cunugga, waxay go'aan ka gaaraan ilaa xadka adeegyada loo baahan yahay si cunugga loogu suurtogeliyo in uu sii watto in uu ka qeybgalo manhajka waxbarashada guud, inkastoo ay tahay hab kale, iyo in horumar laga gaaro la kulanka ujeedooyinka ku qoran IEPda cunugga.

Haddii ka-saaridda tahay isbaddal lagu sameeyo (hoos ka fiiri sifeynta), Kooxda IEPda cunugga ayaa go'aan ka gaara adeegyada ku habboon si cunugga loogu suurtogeliyo in uu sii watto in uu ka qeybgalo manhajka waxbarashada guud, inkastoo lagu qabto xaalad kale, iyo in uu horumar ka gaaro la kullanka ujeedooyinka ku qoran IEPda cunugga.

Go'aan ka-gaarista muujinta

Muddo 10 maalinm dugsiyeed gudahooda oo la qaato go'aan kasta oo lagu baddalo meeleynta cunugga itaalka darran taasoo ugu wacan jebinta xeerka aadaabta ardayga (marka laga reebo ka-saaridda oo ah 10 maalin dugsiyeed oo isku xiga ama ka yar iyo aan ahayn isbaddal lagu sameeyo meeleynta), qeybta maamulka, adiga, iyo xubnaha Kooxda IEP ay quseyso (sida aad go'aan ku gaartid adiga iyo qeybta maamulka) waa in ay fiiriyaan macluumaadka munaasabka ah ee ku saabsan nolosha ardayga, kana mid ah IEPda cunugga, waxayaabaha uu ku arko macalinka, iyo macluumaad kale oo munaasab ah ee aad adiga soo gudbisid si go'aan looga gaaro:

1. Haddii dabeecadda su'aasha ka taagan tahay ay sababtay, ama ay xariir toosan oo la taaban karo la lahayd, itaal darrida cunugga, ama
2. Haddii dabeecadda su'aasha ka taagan tahay ay si toos ah uga dhalatay guul dareysiga qeybta maamulka in ay hirgeliso IEPda cunugga.

Haddii qeybta maamulka, adiga, iyo xubnaha ay quseyso ee Kooxda IEPda cunugga, go'aan ku gaaraan in lala kulmay labada shardi, dabeecadda waa in loo gartaa in ay tahay muujinta itaal darrida cunugga.

Haddii qeybta maamulka, adiga, iyo xubnaha ay quseyso ee Kooxda IEPda cunugga go'aan ku gaaraan in aadaabta su'aasha ka taagan tahay si toos ah uga dhalatay guul darrida qeybta maamulka in ay hirgeliso IEPda, qeybta maamulka waa in ay isla markiiba qaado talaabo oo lagu saxaayo waxyaabahaas ka maqan.

Go'aan ka-gaarista dabeecadda waxay ahayd muujinta itaal darrida cunugga

Haddii qeybta maamulka, adiga, iyo xubnaha ay quseyso ee Kooxda IEP go'aan ku gaaraan in aadaabta ayayd muujinta itaal darrida cunugga, Kooxda IEP waa in ay:

1. Qaado qiimeynta dabeecadda lagu shaqeeyo, haddii qeybta maamulka aysan qaadin qiimeynta dabeecadda lagu shaqeeyo ka hor inta dabeecadda dhalisay isbaddalka meeleynta aysan dhicin, iyo in ay hirgeliso qorshaha faragelinta dabeecadda cunugga; **ama**

2. Haddii horay loo sameeyay qorshaha faragelinta dabeecadda, waa in ay fiiriso qorshaha faragelinta dabeecadda, kaddibna baddasho, sida loogu baahdo, si wax looga qabto dabeecadda.

Marka laga reebo sida ku sharaxan hoos qeybta hoos timaada **Xaaladha khaaska**, qeybta maamulka waa in ay cunugaada ku soo celiso meeleynta laga saaray, haddii adiga iyo dagmada aad raali ku tahiin isbaddalka meeleynta, taasoo qeyb ka ah isbaddalka qorshaha faragelinta dabeecadda.

Xaaladaha khaaska
Dabeecadda ha ahaato ama yeysan ahaanin muujinta itaal darrida cunugaada, shaqaalaha dugsiga waxay saari karaan arday, waxayna ku meeleyn karaan habka waxbarashada kale (sida ay go'aamiso Kooxda IEPda cunugga) ilaa 45 maalin dugsiyeed, haddii cunugaada:

1. U hub u soo qaato (fiiri sifeynta hoose) dugsiga ama uu hub ku haysto dugsiga, xerada dugsiga, ama munaasabada lagu qabto dugsiga oo hoos timaado CDE ama qeybta maamulka;
2. Isaga oo ogsoon haysto ama adeegsado mukhadaraadka sharci darrada ah (hoos ka fiiri sifeynta), ama iibiyo ama doondoono iibinta maado la kantaroolo (hoos ka fiiri sifeynta), inta uu ku sugan yahay dugsiga, xerada dugsiga, ama munaasabad lagu qabto dugsiga oo hoos timaado CDE ama qeybta maamulka; **ama**
3. Dhaawac culus u geystay jirka (hoos ka fiiri sifeynta) qof kale inta uu ku sugan yahay dugsiga, xerada dugsiga, ama munaasabad lagu qabto dugsiga oo hoos timaado CDE ama qeybta maamulka

Sifeynta

Maadada la kantaroolo waxaa loola jeedaa mukhadaraad ama maado kale oo lagu aqoonsaday sida hoos timaado jadwalada I, II, III, IV ama V ee qeybta 202© ee Sharciga Maadooyinka la Kantarool (Controlled Substances Act) [21 U.S.C. 812(c)].

Mukhadaraadka sharci darrada ah waxaa loola jeedaa maado la kantaroolo; balse aan ku jirin maado la kantaroolo oo shari ahaan la hayso ama la isticmaalo sida hoos timaado kormeerka qof aqoon u leh oo shatti ku haysta daryeelka caafimaadka ama sharci ahaan la haysto ama la adeegsado sida hoos timaado madax kasta oo kale sida hoos timaado qodobka sharciga Federaalka.

Dhaawaca culus ee loo geysto jirka waxaa loola jeedaa macnaha la siiyo erayga "dhaawaca culus ee loo geysto jirka" sida hoos timaado baragaraafka (3), qeybta hoose (h), qeybta 1365, cutubka 18, Xeerka Mareykanka (United States Code).

Hub waxaa loola jeeda macnaha la siiyo erayga "hubka halista" sida hoost timaado baragaraafka (2) ee qeybta kowaad (g), qeybta 930, cutubka 18, Xeerka Mareykanka (United States Code).

Ogeysiiska

Taariikhda la gaaro go'aanka lagu saaro oo ah isbaddal lagu sameeyo meeleynta cunugaada taasoo ugu wacan jebinta xeerka asluubta ardayga, qeybta maamulka waa in ay ku ogeysiiso go'aankaas, kuna siiso ogeysiiska ammaanka habka.

ISBADDALKA MEELEYNTA UGU WACAN KA-SAARIDDA DISHIBILIINKA

34 CFR 300.536

Ka saaridda cunugga itaalka darran laga saaro waxbarashada iminka u socota waa isbaddal lagu sameeyo meeleynta haddii:

1. Ka saaridda gaarto in ka badan 10 maalin dugsiyeed isku xiga: ama
2. Cunugga loo geysto taxane ka-saarid ah oo lagu tilmaami karo in uu jiro sasaan:
    a. Bacdamaa taxanaha ka-saaridda waxay gaaraan wadarta 10 maalin dugsiyeed halkii sanno dugsiyeed;
    b. Bacdamaa ay jiraan qodobo dheeraad ah sida dhererka ka-saarid kasta, wadarta waqtiga cunugaada laga saaray, iyo sida ka-saaridyada isugu dhaw yahiin.

In ka-saaridyad lagu tilmaami karo isbaddal lagu sameeyo meeleynta waxay ku xeran tahay sida qeybta maamulka go'aan uga gaarto kiiska iyo, haddii laga hortago, waxay hoos timaad fiirinta habka sharciga iyo dacwadaha maxkamadda.

GO'AANKA LAGA GAARO HABKA

34 CFR §300.531

Guud

Barnaamijka waxbarashada ku kooban shakhsiga Kooxda (IEP) waa in ay go'aan ka gaarto habka waxbarashada kale xagga ka-saaridda oo **ah isbaddalada meeleynta** iyo ka-saaridda hoos timaada **Awoodda dheeraadka ah** iyo **Xaaladaha Khaaska**, ee kore.

RACFAANKA (HABABKA DHAGEYSIGA HABKA SHARCIGA EE LA DADAJIYO)

34 CFR 300.532

Guud

Waxaad soo gudbin kartaa ashtakada habka sharciga (fiiri qeybta Hababka Ashtakada Habka Sharciga ee kore) si aad u codsatid dhageysiga habka sharciga haddii aad qilaafsan tahay:

1. Go'aan kasta oo ku saabsan meeleynta laguna sameeyay sida hoos timaado qodobadaan dishibiliinka; **ama**
2. Go'aaminta muujinta kor lagu sharaxay.

Qeybta maamulka waxay kaloo soo gudbin kartaa ashtakada habka sharciga (fiiri kor) si ay u codsato dhageysiga habka sharciga haddii ay aaminsan tahay in xajinta meeleynta iminka jirta ee cunugaada si la taaban karo u badan tahay in ay dhaawac gaarsiiso cunugaada ama dadka kale.

Awoodda garsooraha sharciga maamulka (ALJ)

Garsooraha ALJ ee la kulma sharuudaha lagu sharaxay sida hoos timaado Garsooraha sharciga maamulka (ALJ) waa in uu fulliyo dhageysiga habka sharciga kana gaaro go'aan. Garsooraha ALJ wuxuu:

1. Cunugaada itaalka darran ku soo celin karaa meeleynta cunugaada laga saaray haddii garsooraha ALJ go'aan ku gaaro in ka-saaridda jebiso sharuudaha lagu sharaxay qeybta hoos timaada Awoodda Shaqaalaha Dugsiga (Authority of School Personnel), ama go'aansado in dabeecadda cunugaada muujiso itaal darrida cunugaada; ama
2. Amri karaa in isbaddal lagu sameeyo meeleynta cunugaada itaalka darran lana geeyo meel ku meel gaar ah oo wax lagu barto muddo aan ka badnayn 45 maalin dugsiyeed haddii ALJ go'aansado in xajinta meeleynta iminka jirto ee cunugaada si la taaban karo u badan tahay in ay dhaawac soo gaarsiiso cunugaada iyo dadka kale.

Waxaa lagu celin karaa hababkaan dhageysiga, haddii qeybta maamulka aaminsan tahay in ku celinta cunugaada meeshii hore si la taaban karo u badan tahay in ay dhaawac soo gaarsiiso cunugaada iyo dadka kale.

Mar kasta aad adiga ama qeybta maamulka soo gudbisaan ashtakada habka sharciga si aad u codsataan dhageysiga noocaas, waa in la qabto dhageysi la kulma sharuudaha lagu sharaxay ee hoos timaada **qeybta Hababka Ashtakada Habka Sharciga iyo Dhageysiyada ku saabsan Ashtakooyinka Habka Sharciga**, marka laga reebo hababka la dadajiyay ee soo socda:

1. CDE waa in ay soo qorsheyso dhageysi la dadajiyo, kaasoo loo baahan yahay in uu dhaco muddo 20 maalin dugsiyeed gudahooda laga bilaabo taariikhda la soo gudbiyo codsiga ashtakada habka sharciga, garsooraha ALJna waa in uu go'aan ka gaaro muddo 10 maalin dugsiyeed gudahooda, dhageysiga kaddib.
2. Haddii adiga iyo qeybta maamulka, qoraal ahaan, aadan ku heshiinin in leyska dhaafo shirka, ama ku heshisaan in aad adeegsataan dhexdhexaadin, waa in la qabto shirka xallinta muddo **todobo** maalmaha jadwalka laga bilaabo marka l a helo ogeysiiska ashtakada habka sharciga. Dhageysiga wuxuu u socon karaa horay haddii laga xalliyo xaajada, kuna qancaan labada dhinac muddo **15** maalin dugsiyeed laga bilaabo marka la helo ashtakada habka sharciga.
3. Gobolka wuxuu sameysan karaa sharciyo kala duwan oo ku saabsan dadajinta dhageysiyada habka sharciga xataa haddii aysan sidaas u sameynin dhageysiyada kale ee ku saabsan habka sharciga, hase ahatee,marka laga reebo waqtiyada, sharciyadaas waa in ay waafaqsan yahiin sharciyada ku jira warqadaan ee ku saabsan dhageysiyada habka sharciga.

Waxaa dhici karto in dhinac uu racfaan ka qaato go'aanka ALJ xagga dhageysiga habka sharciga ee la dadajiyay isla sida ay u noqon karaan go'aanada dhageysiyada habka sharciga (fiiri kor **Racfaanada**).

MEELEYNTA MUDDADA RACFAANKA

34 CFR §300.533

Guud

Sida ku sharaxan kor, marka adiga ama qeybta maamulka aad soo gudbisaan ashtakada habka sharciga taasoo la xariirta arrimaha dishibiliinka, cunugaada waa (haddii adiga iyo qeybta maamulka aadan si kale ku heshiinin) in uu ku sugnaado habka waxbarashada ku meel gaarka ah ee kale inta laga gaaraayo go'aanka ALJ, ama ilaa ay ka dhacdo muddada ka saaridda sida ku qoran looguna sharaxay qeybta hoos timaada **Awoodda Shaqaalaha Dugsiga (Authority of School Personnel)**, hadba tii soo hor marta.

BADBAADINTA LA SIIYO CARUURTA AAN XAQA U LAHAYN WAXBARASHADA KHAASKA AH IYO ADEEGYADA LA XARIIRA

34 CFR §300.534

Guud

Haddii cunugaada loo aqoonsanin in uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira kaddibna jebiyo xeerka aadaabta ardayga, hase ahatee qeybta maamnulka la socotay (sida ku qoran hoos) ka hor inta aysan dhicin dabeecadda keentay in laga qaado talaabada dishibiliin, in cunugaada uu ahaa cunug itaal darran, markaas cunugaada wuxuu sheegan karaa badbaadinta lagu sharaxay ogeysiiskaan.

Aasaaska ogaanta arrimaha dishibiliinka

Qeybta maamulka waa in loo qaato in ay la socoto in cunugaada yahay cunug itaal darran haddii, ka hor inta aysan dhicin dabeecadda keentay in laga qaado talaabada dishibiliin:

1. Aad qoraal ahaan adiga u sheegtay in aad ka walwalsan tahay shaqaalaha kormeerka ama maamulka ee wakaaladda waxbarashda ku habboon, ama macalinka cunugaada in cunugaada u baahan yahay waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira;
2. Aad codsatay qiimeyn la xariirta xaq u yeelashada waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA; **ama**
3. macalinka cunugaada , ama shaqaale kale oo ka tirsan qeybta maamulka soo jeediyay walwal cayiman oo ku saabsan sasaanka dabeecadda uu muujiyo cunugaada, una jeediyay agaasimaha waxbarashada khaaska ah ee qeybta maamulka ama dhaqaale kale oo qaabilsan kormeerka qeybta maamulka.

Waxyaabaha ka reeban

Looma qaadan karo qeybta maamulka in ay ogsoon tahay haddii:

1. Aadan ogolaanin in cunugaada lagu sameeyo qiimeyn ama aad diidid adeegyada waxbarashada khaaska ah; **ama**
2. Cunugaada la qiimeyay loona arkay in u yahay aan qabin itaal darri sida hoost timaado Qeybta B ee IDEA.

Sharuudaha lagu dabaqo haddii aysan jirin aasaas ku saabsan ogaanta

Ka hor inta aan cunugaada laga qaadin talaabo dishibiliin, qeybta maamulka aysan la soconin in cunugaada yahay cunug itaal darran, sida ku sharaxan kor ee hoos timaada qeybta **Aasaaska Ogaanta arrimaha dishibiliinka (Basis of knowledge for sisciplinary matters**) iyo **Waxyaabaha ka Reeban (Exceptions),** waxaa dhici karto in cunugaada lagu qaado dishibiliinka lagu qaado caruurta aan qabin itaal darri eek u kaca dabeecadaha la midka ah..

Hase ahatee, haddii la sameeyo codsiga qiimeynta cunugaada muddada cunugga lagu qaado dishibiliinka, waa in la dadajiyo qiimeynta.

Ilaa qiimeynta laga dhamaystiro, cunugaada wuxuu ku sugnaan doonaa meeleynta waxbarashada sida dugsiga go'aamiso, waxaana ka mid noqon kara ka-joojin ama ka-saarid aysan la soconin adeegyada waxbarshada.

Haddii cunugaada loo garto in u yahay cunug itaal darran, iyadoo la tixgelinaayo macluumaadka ka soo baxa qiimeynta ay fullisay qeybta maamulka iyo macluumaadka aad adiga bixisid, qeybta maamulka waa in ay bixiso waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA, sida sharuudaha dishibiliinka kor lagu sharaxay.

TIXRAACINTA IYO TALAABADA HIRGELINTA SHARCIGA IYO MADAXDA MAXKAMADAHA

34 CFR §300.535

Qeybta B ee IDEA:

1. Kama reebto wakaalad in ay soo sheegto dambi uu galay cunug itaal darran, una sheegto madaxda ku habboon; **ama**
2. Kama hor istaagto hirgelinta sharciga iyo madaxda maxkamadda in ay fulliyaan mas'uuliyadooda xagga ku dhaqanka sharciga Federaalka iyo gobolka marka la soo qaado dambiyada uu galo cunugga itaal darran.

Gudbinta diiwaanka

Haddii qeybta maamulka soo sheegto dambi uu galay cunug itaal darran, qeybta maamulka:

1. Waa in ay hubsato in koobiyada waxbarashada khaaska ah ee cunugga iyo diiwaanka dishibiliiinka loo gudbiyo madaxda si ay u tixgeliyaan, madaxda ay wakaaladda gaarsiiso dambiga; **iyo**
2. Waxay diri kartaa oo keliya koobiyada ku saabsan waxbarashdada khaaska ah ee cunugga iyo diiwaanka dishibiliinka ilaa inta Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Asturnaanta (Family Edducational Rights and privacy Act) (FERPA) ogol yahay.

SHARUUDAHA MARKA WAALIDKA KELI AHAAN CARUURTA UGU MEELEEYO DUGSIYADA GAARKA AH, KHARASHKANA LAGU DALLACO DADWEYNAHA

GUUD

34 CFR §300.148

Qeybta B ee IDEA uma baahna in qeybta maamulka bixiso kharashka ku baxa waxbarashada, kana mid ah waxbarashda khaaska ah iyo adeegyada la xariira, ee cunugaada itaalka darran eek u sugan dugsiga gaarka ama meel wax laga barto haddii qeybta maamulka ay waxbarashada dadweynaha ku habboon ee lacag la'aanta ah (FAPE) ku deeqday cunugaada, adigana aad dooratay in aad cunugaada ku meeleysid dugs gaar ah ama meel wax lagu barto. Hase ahatee, qeybta maamulka meesha dugsiga gaarka ah uu ku yaal waa in ay cunugaada ku daraan dadka baahidooda wax laga qabto sida hoos timaado sharciyada Qeybta B ee ku saabsan caruurta ay waalidiintooda ku meeleyaan dugsi gaar ah sida hoos timaado 34 CFR §300.131 ilaa 300.144.

Lacag celinta ku-meeleynta dugsiga gaarka ah

haddii cunugaada uu horay qaatay waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira sida hoos timaada awoodda qeybta maamulka, kaddibna aad dooratay in aad cunugaad ku qortid barnaamijka ka horeeyo dugsiga ee gaarka ah, dugsiga hoose, ama dugsiga sare iyadoo aan la haysanin ogolaashada ama ku-wareejinta qeybta maamuka, maxkmadda ama garsoorah maamulka sharciga (ALJ) wuxuu qeybta maamulka ka dalban karaa in ay kuu soo celiso kharashka ku baxay ku-qorista haddii maxakamadda ama ALJ go'aansato in wakaaladda aysan cunugaada siinin waxbarashda dadweynaha lacag la'aanta ah ee ku habboon (FAPE) waqti munaasab ah ka hor intaa aan lagu qorin iyo ku-meeleynta gaarka ah tahay shay ku habboon. Waxaa dhici karto in ALJ ama maxkamadda u aragto ku-meeleynta aad sameysay in ay tahay shay ku

habboon, xataa haddii ku-meeleynta aysan la kulmin heerarka Gobolka ee lagu dabaqo waxbarashada ay bixiso CDE iyo qeybta maamulka.

Xuduudda soo celinta kharashka

Waa la dhimi karaa ama waa la diidi karaa soo celinta kharashka lagu sharaxay baragaraafka kore:

1. Haddii: (a) Shirkii ugu dambeeyay ee ku saabsanaa barnaamijka waxbarashda ku kooban qofka (IEP) ee aad adiga tagtay ka hor inta aadan cunugaada ka saarin dugsiga dadweynaha, ma aadan u sheegin Kooxda IEP in aad diidan tahay ku-meeleynta ay soo jeedisay qeybta maamulka in ay cunugaada siiso FAPE, kana mid ah sheegidda waxa aad ka walwalsan ahay iyo rabitaankaada in aad cunugaada ku qortid dugsiga gaarka, kharashkana lagu soo dallaco dadweynaha; ama (b) Ugu yaraan 10 maalmaha la shaqeeyo (kuna jiraan fasaxyada dhaca maalinta la shaqeeyo) ka hor inta aadan cunugaad ka saarin dugsiga dadweynaha, in aadan qeybta maamulka siinin ogeysiis qoran oo ku saabsan macluumaadkaas.
2. Haddii, ka hor inta aadan cunugaada ka saarin dugsiga dadweynaha, qeybta maamulka ku siisay ogeysiis qoran, oo ku saabsan rabitaankeeda in ay qiimeyso cunugaada (kana mid ah oraah ku saabsan ujeedada qiimeynta oo ahaa mid ku habboon oo macquul ah), hase ahatee adigana aadan cunugga keenin si loo qiimeeyo; ama
3. Kaddib marka maxkamadda go'aansato in talaabadaha aad qaaday yahiin kuwo aan macquul ahayn.

Hase ahatee, kharashka la soo celiyo:

1. Waa in aan la yareynin ama la diidin maxaa yeelay waxaa lagu guul dareystay in la soo gudbiyo ogeysiis haddii: (a) Qeybta maamulka kaa hor istaagtay in aad bixisid ogeysiiska; (b) Aadan adiga helin ogeysiisika ku saabsan mas'uuliyadda kaa saaran in aad bixisid ogeyssiiska lagu sharaxay kor; ama (c) Waxay u badan tahay in u haggaansamida sharuudaha kor ku qoran ay cunugga jir ahaan u keenaan dhibaato; iyo
2. sida maxkamadda ama ALJ u gartaan, waxaa dhici karto in aan la yareynin ama la diidin maxaa yeelay waxaad ku guul dareysatay in aad bixisid ogeysiiskii loo baahnaa haddii: (a) Aadan waxba akhrin karin ama aadan waxba ku qori karin Ingiriisiga; ama (b) Waxay u badan tahay in u haggaansamida sharuudaha kor ku qoran ay cunugga u keenaan dhibaato culus xagga niyadda.

ILAHA WAALIDKA

IDEA 2004

Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Itaalka Darran (Individuals wiwht Disabilities Education Act) (IDEA) waa sharci hibinaaya in adeegyo la siiyo caruurta itaalka darran ee ku nool waddanka. IDEA waxay xakuntaa sida gobolada iyo wkaaladaha dadeweynaha u bixiyaan faragelinta hore, waxbarashda khaaska ah iyo adeegyada la xariira in ka badan 6.5 malyan dhalaan, ilmo, caruur, iyo dhalin qabta itaal darri oo xaq u yeesha,

Dhalaanka iyo ilmaha itaalka darran (marka ay dhashaan – 2 sanno) iyo qoysaskooda waxay helaan adeegyada faragelinta hore sida hoos timaado IDEA Qeybta C. Caruurta iyo dhalinta (da'da 3-21 sanno) waxay helaan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira sida hoos timaada IDEA Qeybta B.
http://idea.ed.gov/

Waaxda Waxbarashada Colorado

Bogga internekta Qeybta Hoggaaminta Ardayga ugu Sareeyo (Exceptional Student Leadership Unit) waa ilo waxtara macalimiinta, maamuleyaasha, iyo walidiinta ardayda qabta baahida waxbarashada gaarka ah taasoo ugu wacan itaal darri, hibo, karti gaar ah, ama ardayda barata luqadda Ingiriisiga ee qaba baahida khaaska ah.
Waaxda Waxbarashada Colorado, Exceptional Student Leadership Unit, Office of Dispute Resolution
1560 Broadway, Suite 1175, Denver, CO 80202
www.cde.state.co/cdesped/index.asp
303-866-6694

Bogga Internetka Sharciga Waxbarashada Khaaska ah (Special Education Law Web Page) waxaa loo sameeyay in uu ku siiyo macluumaadka ku saabsan Colorada Special Education Law. Boggaan waxaad ka heli kartaa, waxaadna ka soo dagsan karaa qoraalada sharciga waxbarashada khaaska ah iyo go'aanada ku saabsan Dhageysiyada Habka Sharciga iyo Ashtakooyinka Federaalka. WAxaad kaloo ka soo gadsan karaa koobika Sharciyada Maamulka Sharciga Waxbarashada Caruurta aan Caadiga ahan (Administration of the exceptional children's Education Act) – sharciyadena ku saabsn waxbarashada khaaska ah.
http://www.cde.state.co.us/spedlaw/index.htm

Xariirka Caruurnimada Hore (Early Childhood Connections)

Xariirka Waxbarashad Caruurnimada Hore waa qorrshaha dhalaanka iyo ilmaha Colorado ee hoos yimaada Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Itaalka Darran (Individuals with Disabilities Education Act). Early childhood Connectionswaa qorshe ka dhexeeyo wakaaladaha. Wakaalahdda hoggaamisa xagga hirgelinta waa Waaxda Adeegydada Aadanaha (Department of Human Services) ee Colorado.
www.earlydhildhoodconnections.org
1-877-777-4041

Xarunta Waalidka PEAK (PEAK Parent Center)

PEAK Parent Center waa Xarunta Tababarka Waalidka iyo Macluumaadka (Parent Training and Information Center) ay dawladda federaalka u magacaawday Colorado. PEAK waxay qoysaska iyo dadka kale ku kaalmeysaa adeegyo sida telefoonkeeda, kullamada tababarka, shirarka, bogga internetka, iyo daabacaadda. PTI ahaan, PEAK waxay bixisaa kaalmada waalidka-siiyo-waalidka, hase ahatee ma qabato shirka kooxaha kaalmada. Waxaan qoysaska ula shaqeynaa hal hal, waxaan kaloo la shaqeynaa dawladda gobolka iyo bulshadaha waxbarashada, dayactirka, iyo caafimaadka si loo sameeyo baddalaadda siistemka taasoo horumarisa natiijadaha caruurta.
www.peakparent.org
1-800-284-0251

Xarunta Sharciga Dadka Itaalka Darran iyo Waayeelka

Xarunta Sharciga (Legal Center) waa urur madax banaan aan fa'iido doonin oo ka shaqeeya danta dadweynaha xagga xuquuqda madaniga iyo arrimaha takoorka. Waxaan badbaadinaa xuquuqda aadanaha, madaniga iyo sharciga ee dadka itaalka darran xagga madaxa iyo jirka, dadka qaba HIV, iyo waayeelka Colorado.
www.thelegalcenter.org
1-800-288-1376